REPUBBLICA
DEMOCRATICA SOMALA
UNIVERSITA NAZIONALE SOMALA

KULLIYADDA AFAFKA

# BUUGGA QALIN JEBINTA

ee Shahaadada B.A.

MOWDUUCA:-

# DHAQANKA UGAARSATADA BUUR _ HEYBE

**LA TALIYE**

Prof. CIISE M. SIYAAD

**QALIN JEBIYE**

C/RAXIIM M. AXMED MURSAL

Sannadka 1986

# REPUBBLICA DEMOCRATICA SOMALA

## UNIVERSITA NAZIONALE SOMALA

## KULLIYADDA AFAFKA

## BUUGGA QALIN JEBINTA

**ee Shahaadada B.A.**

## MOWDUUCA:-

# DHAQANKA UGAARSATADA BUUR _ HEYBE


**LA TALIYE**

Prof. CIISE M. SIYAAD

**QALIN JEBIYE**

C/RAXIIM M. AXMED MURSAL



Sannadka 1986

## TUSMADA BUUGGA

***************************

CUTUBKA KOOWAAD:
B TAARIIKHDA UGAARSATADA Bogga 1

CUTUBKA LABAAD:
DHAQANKA UGAARSATADA " " 22

CUTUBKA SEDEXAAD :
DADKA KALE EE KU NOOL B/HEYBE " " 40

CUTUBKA AFARAAD :
TAARIIKHDA BUUR-HEYBE " " 49

CUTUBKA SHANAAD :
SIYAARTA BUUR-HEYBE " " 56

........///////........

**MAHAD CELIN** ( Eknowlegement )

Waxaan jeclahay inaan halkaan uga mahadceliyo raggii sida hagarla'aanta ah gacanta weyn uga geystay intii aan ku hawlanaa qoraalka buugeyga ayagoo ii soo jeediyey fikrado wax ku-ool ah oo ku saabsan arimaha Buur-Heybe; ragaa waxaa ka mid ah : Prof. Ciise Maxamed Siyaad oo ah khabiir ku xeeldheer suugaanta Soomaaliyeed, barena ka ah Kulliyada Luqadaha islamarkaana ahaa la taliyaheyga, ayaa waxaan jeclahay inaan uga mahadceliyo sidii waoneyd ee uu iigu caawiyey fikradihiisa, buugana uu iila habeeyey.

Waxaa kaloo aan jeclahay inaan halkaan uga mahadceliyo Maxamed Max'uud Cabdulle (Sanka) oo isagu ahaa ninka iska leh fikrada buugan oo idil, iguna guubaabiyey inaan wax ka qoro arimaha B/Heybe oo rutii la'aantiis aaney waxba ka suurtogeli la-heyn qoraalka buugan.

Waxaa kaloo aan jeclahay inaan umahadceliyo inanka la yiraahdo Aweys Axmed ~~Cumar~~ (ABBA) oo si wanaagsan uqaabeeyey sawirada ku yaala buugan. Xuseen Maxamuud Cabdulle (Akal) ayaan jeclahay isagana inaan uga mahadceliyo kaalinta weyn uu kaqaatay garaacida buugan (Typing) , iyo rogidiisaba (Dublicating) .

Ugu dambeyntii waxaan umahadcelinayaa inamada kala ah: Muuse Sh. Muuse iyo Salaad Axmed Casir doorka weyn ay ka cayaareen daabacaada Buuggan.

*N.B* : Ogeysiin cidii ay khuseyso:

Buugan Lama Daabacan Karo ,Lamana Rogi karo

Iyadoo AAN Ogolaansho Laga Qabin Qoraha. !!

Qore:

C/Raxiin Max'uud Axmed ( RiNos);

......////////........

# HORDHAC

Waxaan halkan idinku soo gudbinayaa taariikhda ay leeyihiin dadka ugaarsatada ah ku nool Buur-Heybe.
Ugaarsatada ku nool B/Heybe waxay leeyihiin daodooyin iyo dhaqamo ugaar ah oo ay soo mareen taasoo aad ka garan kartid markaad u dhabagashid heesahooda iyo cayaarahooda.
Buugan qalinjebinta ee cinwaankiisu yahay
"Dhaqanka Ugaarsatada Buur-Heybe "
waxaan uqeybiyey shan outub, mid walbana wuxuu ka hadlayaa qeybo kala duwan oo ku saabsan dhaqankooda iyo taariikhdooda.
Cutubka koowaad waxaan kaga hadli doonaa taariikhda ugaarsatada kaasoo si tafatiran aan ugu qeexay dadkii hore ee ku noolaan jirey B/Heybe, cayaarihii ay ciyaari jireen, habkii ay isu guursa jireen, qalabkii ay ugaarsiga u istiomaali jireen iyo arimo kale oo fara badan oo ku saabsan taariikhdii ay soo mareen.
Cutubka labaad waxaan kaga hadli doonaa dhaqanka ugaarsatada, kaasoo ka sheekeyn doona sida ay udhisan tahay herinta, ninka mas'uulka ah herinta, sida loo ugaarto waxyaabaha ay ugaartaan, iyo arimo kale oo fara badan.
Cutubka sedexaad waxaan kaga hadli doonaa sida loo kala degan yahay B/Heybe, dadka kale ee ku nool meeshaas, sidii ay ku yimaadeen meeshaas iyo hawlahooda kala duwan iyo arimo laxiriira.
Cutubka afaraad waxaan kaga hadli doonaa taariikhda ay leedahay B/Heybe iyo Cutubka shanaad oo aan kaga hadli doono arimo ku saabsan siyaarta B/Heybe, waxyaabihii sababay iyo waxyaabaha laga aaminsan yahay arimahaas.

Waxaa kaloo buugan wax kaga tataabtay cayaaraha ay leeyihiin ugaarsatadu, sida loo cayaaro iyo weliba sawiro muujinaya arimahaas.

## CUTUBKA KOOWAAD

### TAARIIKHDA UGAARSATADA

DADKII WAAGII HORE KU NOOLAA BUUR-HEYBE:-

Ummad walba waxay leedahay dhaqan iyo taariikh u gaar ah oo ay leeyihiin,islamarkaana lagu garto.Dhaqankooduna badanaa waa mid K ku saleysan waxyaabo caado ahaan ay u leeyihiin,kaasoo noqon kara mid ay ka dhaxleen awoowayaashood fac ka fac iyo waxyaabo ay ku kordhiyeen.

HadabaBuur-heybe dadka ku nool waa dad leh taariikh qoto dheer oo ay soo mareen,inkastoo faraq weyn uu udhexeeyo dadkii hore ugu noolaa iyo kuwa hada deggan.Farqigaas u dhexeeyo dadkii hore iyo kuwan ma aha wax iska yimid ama daboecadu keentay ee waa mid soo maray heerar kala gedisan,oo ay ka mid yihiin Addoonsi iyo dagaalo fara badan oo dhex maray ayaga iyo qolooyin kale oo soo weeraray.Dagaaladaas faraha badan waxay u suurto geli-liyeen ugaarsatadii hore inay degaan buurta dusheeda, taasoo aheyd meel istaraatiji ah oo ku wanaagsan xagga dagaalka,qofkii fuulideeda aan garaneyna uu ku dhimanaayo ama uu halis ku galaayo.

Sida laga soo wariyey taariikhda inteyan diinta isla-amka soo GAARIN Soomaaliya,Buur-Heybe waxaa ku noolaa qabiil la dhihi jirey KABLALE,waxayna ahaayeen ugaarsato,mana aheyn dad sidaa u tiro badan. Qaabkooda iyo jir ahaan marka la fiiriyo waxay ahaa-yeen dad aad iyo aad u xoog waaweyn murqo leh,kamana duwaneyn dadka loo yaqaan Baantuuga. Markay ugaarsi aadaan qof keliya ayaa hal neef oo gaanan ah (usjin) soo dili jirey,isla markaana dhabarkiisa ku soo qaadi jirey. Waagaas qalab wanaagsan oo ugaar-siga loo isticmaalo ma jirin,sida ay u ugaarsan jireen waxay aheyd: dhagax ayey sida warafka u tuuri jireen ama si caadi ah ayey dhagax gacanta ugu tuuri jireen.

Neefka islamarka uu dhagaxu ku dhaco wuu wareeri jirey,waayo tuuryadooda ayaa waxay ahayd mid xoog badan,weyna orod badnaayeen markaa neefkii cararaayaa wey eryan jireen ilaa ay ka qabtaan.

Neefkii marka la soo qabto haduu nool yahay weli, madaxa ayey dhagxaan uga garaaci jireen. Bir ay ku gowracaan ma jirin,markaa waxay sameyn jireen dhagxaan af leh sida midida oo kale ah ,kaasoo ay ku jeexjeexi jireen. Hilibkana 4 isagoo cayriin ah ayey cuni jireen,marmarka qaarkoodna hadii ay helaan dab wey bisleyn jireen,haddii xitaa ay la kulmaan neef bakhtiyey wey cuni jireen.

sidey u dubi jireen neefka ay cunayaan hilibkiisa waxay aheyd qori dheer oo qoyan ayaa la soo goynayaa,laBada madax ayaa caarad dhuuban looga sameyn jiray kolkaasaa neefkii hore iyo gadaal looga dusin jiray. Laba nin ayaa labada dhinac kala qabanaayo oo ku wareejinaayo dabka dushiisa.

Qabiilka la yiraahdo Kablale noloshiisu sidaas ayey aheyd oo beero ma tabcan jirin. Dhulkaas oo idil wuxuu ahaa hawd jiq ah oo bahalo badan,ugaartana aad ayey ugu badneyd meeshaas. Dhar ma jirin waagaas oo waxay xiran jireen haragga ugaarta ay soo dilaan kaasoo ay u isticmaali jireen hu' ahaan iyo dharba. Noloshoodu waxay aheyd mid adag, waxeyna u noolaayeen sida duurjoogta. Markii dambe Kablale waxaa weerar ku soo qaaday qabiil kale oo la yiraahdo GARMAGALE,ayagoo adeegsanaayo qalab ahaan qori la qoray oo caarad dhuuban loo sameeyey sida waranka. Garmagale wey ka adkaadeen kablale,taasi waxaa u suurto geliyey ayagoo ka tiro badnaa isla markaana ka qalab wanaagsanaa. Kablale markii la eryey waxaa degay Buur-heybe Garmagale. Noloshoodu waxba kama duwaneyn tii kuwii hore,oo ugaarsato ayey iyaguna ahaayeen.

Muddo markey sidaa ku noolaayeen ayaa Garmagalihii waxaa ayggana weerar ku soo qaaday qolo la yiraahdo AJUURAAN oo qabsaday Buur-Heybe. Ajuuraan waxey markaas heysteen dhul fara badan oo koonfurta Soomaaliya ka mid ah laga soobilaabo

xeebta Banaadir, Marka , Buur-Xakaba ilaa Baardheere.

Sida ay na bareyso taariikhda, Ajuuraan wuxuu lahaa boqortooyo weyn mudadaas, markii ay qabsadeen Buur-Xakaba oo ay degeen ayey weerareen Buur-heybo isla markaana wey u suurtogashey inay qabsadaan qoladii deganeyd markaas oo aheyd Garmagale, weyna ka eryeen goobtii.

Ajuuraan xukunkiisu sidaas ayuu u socdey inkastoo la sheegay in qaarkood ay ahaayeen ugaarsato. Sida odayaasha Buur-xakaba ay rumeysan yihiin, waxaa jirtay in qolo la yiraahdo (Oromo)oo ka timid Itoobiya ay waagii hore soo galeen arligaas, isla markaasna ay eryeenX Ajuuraankii fadhiyey Buur-xakaba iyo hareeraheeda. Ajuuraan markii la eryey wuxuu u cararay xaga Baardheere, oromadii iyadana waxay degtay dhulkii ay ka qabsatay Ajuuraan, waxeyna ku fiday ilaa Jubada-Sare (ALTO GIUBA) oo dhan.

## XAGEY KA TIMID EYLADA:-

Intay Oromadu dhulkaas Buur-Xakaba iyo hareeraheeda maamuleysey ayaa waxaa jirtay in Buur-Heybe ay yimaadeen dad aan la garaney oo qaxooti ah. Dadkaas qaabkooda wuxuu u ekaa kuwii KX hore ugu noolaan jirey dhulkaas oo ahaa Kablale iyo Garmagale, Waxeyna ahaayeen dad xoog waaweyn oo dhaadheer, murqana leh. Qalabka ay isticmaalayeena wuxuu ahaa gamuuno aan bir laheyn oo caarad dhuuban iyo mariid iyo weliba eeyo.

Qoladaas oo markii dambe loogu yeerayey Eylo waxay degeen buurta dusheeda halkaasoo ay ku noolaayeen. Eyladu waxey ahaayeen ugaar-sato, aygoo isticmaalaya eeyo iyo mariid taasoo u fududeyn jirtay hawshooda oo aheyd ugaarsiga. Wax kale oo ay cuni jireen oo aan hilib aheyn haba yaraatee ma jirin. Ugaarta keliya kuma ekeyne, xoolaha dadka rayadka ah ay leeyihiin ayey dilan jireen.

Inkastoo waagaas sharci uu jiri jirin, dagaalo fara bade-an ayaa jiri jirey. Eyladu waxey aheyd seef la bood cidna aan gx garaneyn, waayo waxey isku haleynayeen mariidka oo qofku haduu

dhiigiisu gaaro uu hore ka dhimanayo iyo buurta oo ah meel xaga ~~a~~ dagaalka ku wanaagsan oo istaraatiji ah. Haddaba/su'aasha maasha taal waxey tahay xagey ka timid Eylo ?

Sida uu na barayo magaca eyle marka aan baaris cilmi-afeed ku sameyno wuxuu noqonayaa EEY-LEH amax afka maayda(Eey-lè) taasoo macnaheedu yahay kuwii eeyaha lahaa ama wadan jirey. Buurtana ayaga ayaa loogu magac daray oo kolkii hore waxaa la dhihi jirey BUUR-EYLE.

haddaba qolada la yiraahdo eyle waxaa loo maleynayaa in markoodii hore ay ka yimaadeen Itoobiya,maxaa caddeynaayo arintaas ?

Eyladu inay ka ~~kx~~ timid Itoobiya waxaa caddeynaayo Mariidka,waayo markii hore mariidka waxaa looga keeni jiray Itoobiya.Mariid lagu sameyn jiray Buur-Heybe ma jirin waagaas.

Haddaba Eyladu ayagoo koox ah oo mariid iyo wax walba sita ayey yimaadeen goobtaas,weyna degeen.

Sababta ay Buur-Heybe u degeenna waxey aheyd laba siyood:

1)Eyladu waxey aheyd ugaarsato,sidaa darteed B/heybena waxey aheyd dhul keyn ah oo ugaar badan leh.

2) Buurta dusheeda waxaa ku yaal ilo badan oo aan biyahoodu gureyn xitaa hadii jiilaalka la gaaro.

Arrimahaas aan soo sheegnay iyo kuwo kale oo fara badan ayaa u suurto geliyey in Eyle ay degto Buur-Heybe.

Sababta ay dhulkooda uga soo qaxeena waxa ugu weyn arimo xag dagaal la xiriira. Qaab ahaan markaad/isu fiirisid Eylada iyo qolada deggan Qalaafe oo loo yaqaan (Shabeelle) waa isku mid waxaana loo maleynayaa inay wada dhasheen.

Dhaqanadii Hore Ee Eylada:

Waxaa la aaminsan yahay in Eyladu ay ahaayeen dad aan diin laheyn,xitaa markii ay diinta islaamka soo gaartay Soomaaliya. Arintaana waxaa cadeynaayo in aan la sheegin qof ka mid ah oo weligiis ku xaadiray meelaha dadka muslimka ah ay isugu yimaadaan ama masaajid. Sababtuna waxay aheyd ayagoo had iyo jeer duur ku jir ahaa oo ugaar dabajoogay.
hawshooduna waxay aheyd mid iska socota oo aan kala go'laheyn,oo waxaad ka garaneysaa faracii ka haray iyaga ilaa maantadan ay duur ku jir yihiin meelaha qaarkood ee dalka ka mid ah.

Arintu si kasta ha ahaatee caadooyin iyo dhaqamo u gaar ah ayey lahaayeen inkastoo ay ahaayeen kuwo aan fududeyn. Dhaqankoodu wuxuu ku saleysnaa ugaarta ay ugaarsan jireen oo ay ka mid ahaayeen:
Sagaarada, Geriga, Biciidka, Goroyada, Wiyisha,Deerada,Cawsha iyo Garanuugta (eelè-gaduud).
Kolkaad u fiirsatid heesahooda markey cayaarayaan waxay ubadan yihiin ammaan ku saabsan ugaarta.

Eyladu waxay lahaayeen xiligaas odayaal maamula oo ay ka dambeeyaan kuwaasoo ahaa Hergaantiyo. Koox koox ayey u ugaarsan jireen iyagoo uu hogaaminayey hergaanti,waxayna barteen sida loo sameeyo mariidka oo waagii hore looga keeni jirey Itoobiya. Sababta ugu wacneyd inay midoobaan waxay aheyd, iyadoo uu dagaal dhex mari jirey iyaga iyo dadka raacatada ah oo ku noolaa agagaarkaas. Isbahaysigaas ay sameysteen wuxuu keenay inay helaan qalab ka wanaagsan kuwii hore ay u isticmaali jireen kuwaasoo ka mid ah ,falaaro bir leh, midiyo iyo waranmo.

Sida ay taariikhdu sheegeyso xiligaan waxaa joogay Buur-Heybe nin la dhihi jiray DUBKAA-BAALOW oo ka dhashay Eylada. Wuxuu ahaa nin magac weyn ku leh geyigaas, wuxuuna isbiday inuu yahay nin geesi ah, wuxuuna sameyn jiray waxyaabo qallafsan, oo ka mid yihiin dhac , dil iyo boob.

Dadka socotada ah ee soo maraya B/heybe ayuu dariiqa u fariisan jirey,intuu dilo ayuu xoolahana ka dhici jiray. Eyladii markaas deganeyd meesha waxba uma dhimi jirin,markii dambena wuxuu u noqday hogaamiye. Wuxuu lahaa gacan yarayaal asaga hoos joogay oo ku taakuleynayey hawshiisa foosha xumeyd.

Sida uu dadka u dili jirayna waxay aheyd, intuu baal-dooro ama daayeer dhintay dibkiisa dabada isaga xiro ayuu wadada hareeraheeda seexan jiray. Markaasuu dadka socotada ah ku dhihi jiray _Iga Siib ama Iga Bixi !, markaasaa ruuxii safarka ahaa isagoon waxba galabsan uu dili jiray.

Dubkaa-baalow noloshiisoo dhan waxay ku dhisneyd dil iyo dhac, haddii qof soo galeeti ah uu soo galo tuulada waa loo sheegi jirey, sinaba uma Baxsaneyn.

Xukunkiisu wuxuu la mid ahaa ninkii la dhihi jirey Geeddi-Baabow oo mar ka amar ku taagleynayey Buur-Xakaba.Geedi isagana caadada uu lahaa waxey aheyd in gabadha inta aan la guri geyn isaga uu marka hore todobada la galo, taaso keentay in gabdho badan waagii geedi-baabow uu noolaa ay ifka isu qoonsadeen oo isdileen.

Raggii haweenkaas qabeyna markey isku dayaan inay aargutaan waa la dili jiray.

## DUBKAA-BAALOW IYO XUKUNKIISA

Sida la wada ogsoon yahay meel la yiraahdo (Buur-Heledè oo u dhow B/heybe) waxaa joogi jirey nin la yiraahdo FEYLA-AAROW. Goobtaa iyada ah markaa waxa deganeyd Eylo, isaga ayaana xukumaayey. Feylè-aarow xukunkiisu isagana wuxuu ahaa mid qalafsan sida kuwii hore aan u soo sheegnay.
Dadka ku nool meeshaa iyada ah waxba ma yeeli jirin, laakiin socotada ayuu leyn jirey. Goobtaa waxaa ku yaalay ceel la dhihi jirey (Showlè-Alèn Garaar), wuxuu ahaa ceel aad iyo aad u dheer oo aan [illegible] sal laheyn.

Markaa wuxuu sameyn jiray, qofkii aan la garaneyn ee soo gala tuulada intuu u yeero ayuu dhihi jirey kaalay waxbaan ku tusayaa. Ruuxii markaa wuxuu isleeyahay bal waxaan la sheegayo soo arag. Faylè-Aarow markaasuu wuxuu leeyahay isagoo taagan ceelka qarkiisa fiiri ceelka gudihiisa! ruuxii markuu ku foorarsado ceelka ku tuuri jirey. Faylè-aarow isagana sidaas ayuu u dili jirey dadka socotada ah.

Dubkaa-Baalow iyo xulafadiisa ayagana B/heybe ayey ka amar ku taagleynayeen. Waxaa jirtay in labada xukuumadood ay iska warqabeen, midba ka kale uu ogyahay waxa uu sameynaayo. Dadkii raacatada ahaa ee hareerahaas u soo daaq doonan jirey wey ka hareen markii ay maqleen falaka foosha xun ee ay ku kacayaan nimankaas. Waxaad moodaa in Eyladu waagaas ay ahaayeen dad[illegible] iskood u madax banaan waayo, ma jirin wax weeraro ah oo lagu soo qaaday iyo dagaallo hogaamin adag awgeed. Arintu si kastaba ha ahaatee maamul sare ayey lahaayeen Eyladu xilligaas.

Dhaqankooda markaan fiirino, waagaas waxaa jirey cayaaryo fara badan oo ay cayaari jireen, inkastoo markii dambe ay baaba'een wax qoraal ahna aan laga sameyn. cayaarta ugu muhiimsaneyd cayaarahaas ee la xusuusan yahay waxaa la yiraahdaa (Baal-Dooriyow). Cayaartan in kastoo waqtigan aynu joogno la ciyaaro,haddana wey ka duwan tahay sidii markii hore loo cayaari jirey.

# CAYAARTA BAAL-DOORIYOW

Cayaartan waxaa B/Heybe laga cayaari jirey mudo hore. Cayaaraha sidoodaba waxaa la cayaaraa marka la xusaayo maalmo xusid mudan sida maalmaha iidaha ah iyo aroosyada I.W.M. Haddaba waagaas Eyladu ma laheyn maalmo u gaar ah oo ay xusuustaa mana garaneyn aroos la xushmeeyo ama la cayaaro, waayo qofba tii uu doono ayuu iska kaxeysan jiray oo diin ma aaminsaneyn.

Haddaba cayaartaas BAAL-Dooriyow waxay cayaari jireen marka tusaale ahaan ay soo dilaan ugaar weyn (usjin) sida Geriga, isla markaana dhulkuna barwaaqo yahay oo roobab badan da'een. Sida ay u cayaari jireenna waxay aheyd kuwo neefkii ayey dubayaan kuwana inta uu bislaanayo ayey cayaari jireen,iyagoo ku dul wareegeysanaya dabka dushiisa. Kuwa cayaarayaa waxay dabada ku xiran jireen haraga sagaarada oo ay geesaha baalka doorada uga sureen, wejigana waxay marin jireen dambas islamarkaana harag sida (maschero) u sameysan ayey ku xiran jireen. Lugaha iyo garbahana waxey ku xiran jireen iskudhaf ka kooban baal-dooro iyo qodax kashiite (caano qub) oo si xirfad leh maqaar loogu tolay. Ugaartii inta ay bislaaneyso ayey cayaari jireen ayagoo heeso qaadaya islamarkaana sacabka garaacaya.

Cayaartan waxay noo cadeyneysaa in eyladu ahaayeen dad aad u jecel ugaarta, taasoo ay ka doorbidi jireen xoolaha kale. Heesaha badanaa ay qaadi jireen waxay ku amaani jireen ugaarta sida Geriga, oo ahaa marka laga reebo sagaarada ugaarta kan ay ugu jecel yihiin, sababtoo ah:

1) Hilibkiisa oo macaan,bisleyntiisana saacado ayey qaadaneysaa.
2) Subagiisa oo waxtar weyn u leh jirka dadka, oo qofkii caba dhowr jeer uu noqonayo mid xoog badan.

Hadaba cayaarta Baal-Dooriyoow markii dambe waxey noqotay mid la ciyaaro maalmaha iidaha ah iyo maalmaha siyaarta loo imaado B/heybe. Qaabkii cayaarta loo cayaari jirey iyo heesaheeda dhamaan waa isbedeleen, taasi waxay noo cadeyneysaa in cayaartaa iyada ah ay aheyd mid mudo dheer la soo cayaarayey,

oo taariikh qoto dheer leh.

Sideynu hore u soo sheegnay Dubkaa-baalow ayaa xukumaa-yey B/heybe waagaas isagoo ku dhaqmaaya falalkiisii foosha xumaa. Maalimba maalinta ka dambeysa wuxuu sidaa soodaba, ayaa waxaa dhaoday maalin wiil dhalinyaro si fiican uga warqaba arimihiisa isagoo geel la jira dariiqa u fariistay. Dubkaa-baalow markaasuu wiilkii ku yiri: baalkan dooro oo dabadeyda ka taagan igasiib, iguna sur ! wiilkii intuu cabaar aamusey ayuu fekeray. Wiilku wuxuu ahaa geesi, waayo wuxuu ogaadey in ninku sinaba uga fakaney wiilkii iskama uu waaline intuu iska dhigay wax ka siibaya ayuu geeska xx deerada oo wiilka gacanta ku sitay caloosha kaga taagay. Nabarkaas ayuuna u dhintay dubkaa-baalow, xukunkiisii adkaana halkasuu ku baaba'ay.

## FAYLE-AAROW XUKUNKIISII


Sideynu hore u soo sheegnay Faylè-Aarow wuxuu mudo ka talinaayey (buur-heledè) oo wax yar u jirta B/heybe. Waxaana loo maleynayaa inuu joogay goobtaas bartamihii qarnigii 17aad,isagoo ku kici jiray falal fool xun oo baniaadaminimada ka baxsan. Wuxuu wax ka bedelay markii dambe siyaasadihii uu ku dhaqmi jiray wuxuuna bilaabay dadka safarka safarka ah markay yimaadaan goobtaas inuu soo dhaweeyo, isagoo ay ka tahay khaa'inimo. Gogol ayuu u dhigi jirey, markaasuu ku dhihi jirey waan idin xxx martiqaadayaa kolkaasaaxxx awrtii ay wateen dadkii musaafurka ahaa intuu rarka ka dhigo qali jirey ayagoon ogeyn. Markaa dadkii waxay isleeyihiin war ninku wanaagsanaa ilyn waxba lama soodaan, kolkaasey hilib ka dhergi jireen, si wanaagsana u seexan jireen. Markey aroortii isyiraahdaan baxa awrtii ma leh! hadey isaga weydiiyaana wuxuu dhihi jiray hilibka xalay aad cuneyseen iyo kuruska aad tuurtuureyseen awrtiinii ayey aheyd, hadii aad xoog qabtaan soo bareera hadii kalena cagaha wax ka daya intaanuu mariidka idin saaqin.

Dadka markaas intii la dagaasha wuu dili jiray, isagoo istiomaalaya falaaro mariid ku dheehan.

Haddaba waxaa dhacday maalin maalmaha ka mid ah inuu nin awr keliya sita ku soo hoyday tuuladii. Ninku awrkaas keliya ayuu ka qabay xoolo oo idil, wuxuuna ahaa nin xoog badan,,; magaciisana waxaa la dhihi jiray Eedèn Maadoow. Feylè-Aarow ninkiibuu soo dhaweeyey,gogol ayuuna u dhigay, markaasuu weydiiyey inay cid kale la socoto iyo in kale. Ninkii wuxuu ku jawaabay; keligeey baan ahay, waxaana u imid halkaan inaan geedo aan ka sameysto bukur iyo mayrax ka goosto. Faylè wuxuu ku yiri ninkii, ka waran haddii aan ku martiqaado caawa, maadaama aad sabool tahay oo awr keliya aad wadatid.Eedèn wuxuu ku jawaabay waxba kama qabo hadii aad caawa meel aan seexdo iyo cunno i siisid.

Feylè-Aarow awrkii ninku sitay ayuu gowracay iagoon ogeyn. Markuu hilibkii bislaaday ayuu yiri Eedèn hilibkaan ka dhereg, Eedèn hilbkii loo keenay markuu ka dhergay ayuu u mahad-celiyey Feylè, durbadiina hore ayuu ka seexday.

Markuu waagii baryey Eedèn awrkiisii ayuu waayey, wuxuuna weydiyey Feylè inuu arkay iyo in kale, Faylè wuxuu yiri:
(Eeden gurbigiikaa kan adì owki dhan sosheey aamasi ma ahaa !) micnaha hilibka aad xalay oo idil cuneysey awkaagii ayuu ahaa. Eedèn aad buu uga xanaaqay erayadaas, isla makiiba dagaal gacmaha ah eyey fooda isgashadeen ayagoo markaas joogay meel u dhow ceelki la dhihi jiray Sholè-Alin garaar. Markey isqabsadeen labadii nin ayaa mid walba wuxuu isku dayey inuu kan kale legdo,hase yeeshee wey kala xoog badin waayeen, markaasaa ayagoo isheysta ceelkii iskula dheceen,halkaasoo ay ku dhinteen. Markii uu dhintay Faylè-Aarow waxaa dhacday in dad badan oo hore aan u iman jirin tuulada ay yimaadeen. Waxyaabaha ugu weynaa ay u iman jireena waxay aheyd Geedaha laga fiiqo meyraxda oo aad ugu badnaa halkaas sida Yaaqa, meelaha qaarkood oo malab laga heli jirey oo ku badnaa dhulkaas, iyo daaqsi. Arintaasna waxay keentay in Eyladii ku nooleyd B/heyb iyo B/hèlèdè ay la dagaalamaan dadka ku soo qulqulaya meelahaas.


FEYLA-AAROW
AWEES ABBA

## ADOONSIGII EYLADA

Xukuumadihii Dubkaa-Baalow iyo Faylè-Aarow, waxay mudo soo jiraanba, markii dambe wey baaba'een ka dib markii la dilay labadoodiiba. Xilligaa wixii ka dambeeyey waxaa bilowday dagaallo fara badan oo dhex maray Eylada iyo qolooyin kale. Qolooyinkaas badankood waxay ahaayeen dad xoolo dhaqata ah oo iyaguna degaankas ku nool. Dagaaladaas waxay ahaayeen kuwo isdabajoog ah oo dhiig badan uu ku daatay, wuxuuna wax weyn ka bedelay taariikhda ugaarsatada. Eyladu waagaas waxay aheyd mid qab weyn,isuna heysata inaan cidna jebin karin. Goobtaas ay deganeyd uma ogoleyn inay cid kale soo degto ama xoolo lagu daaqsado hareerahaas.Geelii agagaarkaas B/heybe lagu daajinaayo ay arkaan falaar ayey ku dhufan jireen, weyna qalanaayeen.

Mudadaas wixii ka dambeeyey waxaa bilowday dagaalo dhex-marayE Eylada iyo Gaaljecel oo badidood ahaa daaqsato,inta badana waa laga guuleysan jirey. Markii dambe dagaalkii wuu balaartay ka dib markii ay yimaadeen qabiilo kale oo markaas raadinaayey adoon ay ku shaqeystaan. Gaaljecel iyo Eylo dagaalkoodu wuxuu ahaa mid joogto ah oo aan kala go' laheyn, arinta ugu weyneyd ee sababtay inuu dagaalkaas daba dheeraado waxey aheyd Eylada oo aan ogoleyn in xoolo lagu daajiyo hareerahaas, sababtuna waxey aheyd waxay aaminsanaayeen hadii xoolo lagu daajiyo hareerahaas ugaarta ayaa fogaaneysa. Hadey ugaarta fogaatana noloshooda ayaa khatar geleysa waayo noloshooda waxa laf dhabar u ah ugaarta.

Arintu si kastaba ha ahaatee, Eyladii iyo Gaaljecelkii wuxuu dagaalkoodii socdaba waxaa yimid dad aan xoolo wadan oo raba in iyaga ay qabsadaan kuwaasoo ah kuwii addoonta raadinaayey. Ugaarsatadii iyo qoladaas ayaa dagaal fooda isgashaday,inkastoo Eylada laga gacan sareeyey qaarna laga dilay, qaarna aygoo nool la watay. Markaas wixii ka dambeeyey Eyladii wey baqatay, weyna kala firidhay. Kuwii ku haray goobtaas si isdabajoog ayaa loo soo weerari jiray,inkastoo ay isdifaaci jireen, hadana qaarbaa laga kaxeysan jiray.

Sida la sheegay kuwa la soo qabsado ma aheyn kuwo la iibsado, laakiin qofkii mid soo qabsada asaga ayaa ku shaqeysan jx jirayisla markaana qofkaas qabiilkiisa ayuu sheegan jirey maadaama la lahaa. Eyladii isla qab weyneyd waxay noqdeen markii dambe sida ugaartii in la ugaarsado, isla markaana wey dhudhuuman jireen. Waxay ku dhuuman jireen buurta dushooda iyo jiqda, kuwana waaba isaga carareen meeshawaxaana la sheegay iney degeen hareeraha Daafeed iyo meelo ka mid ah Jubada Sare.

## Dagaalkii Ugaarsatada Iyo Biimaal

Addoonsigii ugaarsatada wuxuu soodaba markii dambe waa laga war helay, si ba'an ayaana loo soo weeraray. Qabiilka la yiraahdo Biimaal oo deganaa Marka iyo hareeraheeda ayaa wax weyn ka bedelay taariikhda Eylada. Biimaalku waxay lahaayeen beero waaweyn oo lagu waraabiyo wabiga, waxaana la sheegay in waagii kxx hore ay lahaayeen addoomo uga shaqeeya beeraha.

Markii dambena waxay ka war heleen in dadka Eylada ah i ee deggan B/heybe la addonsanaayo, wixii markaa ka dambeeyeyna Biimaal waxaa la sheegay inuu weerar ku qaaday ugaarsatadii. Dagaal ayaa la sheegay inuu ka dilaacay goobtaas, iyadoo qalabka lagu dagaalamayey uu ahaa waranmo , seefo, qaanso iyo fallaaro. Dagaalkaas waxaa la sheegay in ugaarsatada laga guuleystay, dad badan oo Eyla ahna laga x qabsaday. Sababta ugu weyneyd oo ugaarsatada looga guuleystayna waxay aheyd aygoo qolooyin kale dagaal kula jiray.

## Guurkii Hore Ee Ugaarsatada

Ugaarsatadu guurkoodu waagii hore ma aheyn mid diinta islaamka waafaqsan, lakiin waxay lahaayeen hab gaar ah oo ay isu guursadaan. Sideynu hore u soo sheegnay Eyladu qofba tuu doono xy ayuu iska kaxaysan jirey, markii dambena waxay lahaayeen caado. Caadadaasna waxay aheyd in wiilka iyo gabadha isguursanayaa ay seddex jeer ku wareegeystaan geed. Geedkaasna wuxuu ahaa mid khaas ah oo la yiraahdo (Mareer). Markuu sidaa yeelo qofka naagt-iisa wuu kaxaysan jirey.

Caadadan waxaa la sheegay iney soo jirtay mudo dheer, waxaana lo maleynayaa inay baaba'day Qarnigii 18naad bilowgiisii. Ninku marka uu rabo inuu iska furo naagta hadallo ayuu dhihi jiray waxaana ka mid ahaa erayada uu dhihi jiray;
Ninbaa raba inuu naagtiisa furo, intuu herinta dhex istaago aydoo hergaantiguna uu joogo ayuu oranayaa heblaayo waxay iga tahay (tolin kala go'ay iyo laf kala jabtay oo kale — meherkeedun waa eey afar jir ah). Tolin waxaa loola jeedaa liilinka yar ee kabaha lagu tolo,hadii uu kala go'o kabtà wey kala baxaysaa oo isma qab-saneyso, laftana hadii ay kala jabto ma kabmeyso, sidaa darteed ayey hal qabsi uga dhigteen.

Eeyaha waagii hore ugaarsatadu waxay u dhaqan jireen sida xoolaha oo kale, ilaa waqtigaan aynu joogno meel walba oo ay joogaan waxay leeyihiin eeyo kuwaasoo ka caawiya hawshooda oo ah ugaarsiga. Sida ay u caawin/jireen eeyaha waxay aheyd markii la arko ~~mgax~~ ugaar oo ay ku dhuftaan falaarta eeyaha ayaa lagu toosin jiray, markaa eygii wuxuu hakinaayaa orodkii ay ordeysey ugaartu.
Ugaadha yar yar sida Sagaarada iyo Dagiiranka EEYAHA ayaaba soo dili jiray. Markaa taasi waxay na tuseysaa in ugaarsatadu eyda ay u dhaqan jireen sida xoolaha, maadaama aan ka garaneyno markay isfurayaan erayada ay dhihi jireen.
Gabadha inta aan la guursan waxay madaxa ku leedahay Shuruf(dhoor) madaxa timihiisa inta kale oo dhan waa la xiiri jiray, maradana waxey ku xiran jireen naasaha dushooda.

Caadadan waxaad moodaa inay weli haystaan maadaama aad ku arkeysid meel walba oo ay joogaan. Hadii qof naagtiisa uu ku arko qof kale haddii uu yahay walaalkii xataa wuu dili jirey, isagoon naagta xxx waxba weydiin qaladka oo dhan ninka ayuu dusha ka saarayey.

Arimahaas oo idil waxay na tusayaan in ugaarsatadu ay ahaayeen dad aad ugu xun dhinaca haweenka. Gabadha waxaa dhoorka loogu sameyn jiray si loo garto inay inan tahay iyo in kale. Luqadda ay ku hadli jireen iyo tan hadda ay ku hadlaan markaad isu fiirisid farqi weyn baa u dhexeeya, oo waagii hore luqadoodu waxay aheyd mid aan la garaneyn. Sababtuna waxay aheyd markii ugaarsatadii kala qeybsantay afkii waxaa ku dhacay isbedel wuuna kala qaybsamay. Kuwo beeraley ayey noqdeen luqadooduna waxey noqo-tay Maayda, waayo waxey isdhexgaleen Eelayda.Kuwana waa ugaarsato waxayna ku hadlaan luqadii ay ku hadli jireen oo Maaydu ku qasan tahay, taasi waxaad ka garaneysaa markey hadlayaan in luqad qalafsan ay ku hadlaan oo ayga keliya isku af garanaya.

Waxaa hubaal ah in ugaarsatadii hore ay lahaayeen AF gaar ah oo hadda baaba'day, waxaa caddeynaayo arintan markey hadlayaan meesha la rabay in shibanaha (G) ay ugu dhawaaqaan (KH) tusaale: sida Sagaaro — Sakhaaro I.W.M.

## Kala Jabkii Ugaarsatada

Dagaaladii faraha badnaa ee ay ugaarsatadu la galeen qolooyinkii soo weeraray wuxuu dhaliyey in ugaarsatadii badankood ay isaga cararaan B/heybe si ay naftooda u badbaadiyaan.Kuwii ku haray meeshana waxaa la sheegay inay ahaayeen kuwo isku duuban, waxeyna lahaayeen sharciyo adag oo ay sameysteen markii dambe. Sharciyadaas waxaa ka mid ahaa :

1) Inay dilaan islamarkaana xoolahana kala wareegaan qof alaale qofkii xoolo meelahaas ku daaqsanaayo, taasoo ay uga jeedeen inay kaga aargutaan weeraradii lagu soo qaaday;

2) Ugaarsatadu waxay isku salaami jireen X "Booney Boon" jawaabtuna waxay aheyd " Boontaa Liibaan" , hadaba qofkii sidaas lagu salaamo ee garan waaya waa la dili jirey. "Boon" waxaa loola jeedaa ugaarsato, sidaa darteed qofkii aan aheyn ma jawaabi karo, ayaguna wey dili jireen.

Buur-Heybe waxaa ku yaalay geed weyn oo dhexda ka daloola oo aan sal laheyn, waxaana la dhihi jirey "YAAQ-QATIL", halkaas ayey ku ridi jireen waxay dilaan. Ugaarsatada waagaas xx cid la deganeyd ma jirin, iyadoo ruuxii ay cidlo ku arkaan ay dili jireen. Waxaa la sheegay in adoonsigii iyo weeraradii lagu soo qaadi jirey ugaarsatada uu dhamaaday xiligaa wixii ka dambeeyey,Eyladana waxaa la sheegay in falalkoodii foosha xumaa ay wadeen ilaa muddo. Markey heleen nabad buuxda ayaa hawlahoodii caadiga ahaa ee ugaarsiga dib ugu laabteen.

Sida taariikhdu ay sheegeyso Qarnigii 19naad bilowgiis ayaa ugaarsatadii ku nooleyd B/Heybe ay bilaabeen beero qodaalka ka dib markii ay ogaadeen inay faaiido u leedahayxxx waayo waxay lahaayeen xoolo fara badan oo ay ka mid yihiin geel iyo lo'. Wixii markaa ka dambeeyey waxaa la sheegay inay noqdeen dad diinta islaamka si fiican u heysta oo cibaadeysanaayo. Marba marka xka dambeyso waxaad moodeysaa in hawshoodii hore ee ugaarsiga gabaabsi sii noqoneyso, inkastoo ayan faraha kawada qaadin.

Hore waxeynu u soo sheegnay in Eyladu ay kala jabtay; waxayna u qaybsantay laba qaybood :

1) Kuwo ugaarsigii ayey weli ku nool yihiin oo noloshoodu waxba iskama bedelin sidii hore waxaana loo yaqaanaa "Eylo-Jafaay" .

2) Kuwa kalena sideynu hore u soo sheegnay waa kuwo hawshoodii BEDELAY oo xoolo iyo beero sameystay, waxaana loo yaqaanaa " Eylo-Buur ".

Eylo-Jafaay/waa kuwii markii adoonsigu socday ka carartay B/heybe, Markii dambe oo nabad dhacdayna ku soo laabteen goobtoodii, waxeyna la yaabeen isbedelka weyn ee ku dhacay kuwii ay meesha uga tageen. Eylo-Jafaay ayga hawshooda waxba kama bedelin oo ugaarsi ayey ku nool yihiin ilaa iyo maanta ayagoo isticmaalaa eeyo, shabaq, falaaro iyo qaanso, waxeyna noqdeen kuwo had iyo jeer duurka ku jira oo aan deegaan u gaar ah laheyn.

Kuwii deganaa B/Heybe oo dhaqankoodii bedelay sida qabiilooyinka kale waxey sameysteen niman caaqiliin ah oo maamula iyo nabadoono. Waxeyna barteen/sharciyada diinta islaamka ku dhaqmaan labadii israbta wey isnikaaxsan jireen, qofkii qof kale naagtiisa ku arko waa la dili jiray I.W.M. Ugaarsigu wuxuu noqday mid aan la iloobin, laakiin waqtigii la doono leyska aado, inta kale waqtigooda waxay ku dhameyn jireen beero qodaal iyo xoolodhaqasho. Markii la maqlay in Eyladii isbedeshey dad badan ayaa B/heybe ku soo qulqulay oo ay ka mid ahaayeen niman ahlu-diin ah iyo kuwo baayacmushtar ah oo dheryo iyo gambaro ka iibsan jirey meesha.


DHERYO SAMEYNTA

Farsamada ugu weyn oo ay ugaarsatadu soo bandhigeen ilaa iyo maantana looga dambeeyo waa farsamada Dheri sameynta. Xirfadaa iyada ah waxaa la sheegay inay soo baxday markii Eylada ay bilowday beero qodaalka waxeyna soo martay heerar kala duduwan oo taariikh qoto dheer leh. Dadka qaarkii waxayba rumeysan yihiin in dheri sameynyttu ay ka horeysey beero qodaalka, sababtoo ah bay yiraahdeen badarka ka soo go'a beeraha waagii hore ma jirin weel lagu kariyo, sidaa darteed Eyladu markii dheri qoridda ay bilaabeen ka dib ayey beer qodaalkana barteen.

Heerarka kala gedisnaa ee dheri sameyntu soo martay waxaa ka mid ah ; ciida laga sameyn jirey dherida waagii hore ma wanaagsaneyn waayo marka la qaso x ma aheyn mid isqabsaneysa, isla markiiba wey kala daadan jirtay sidaa darteed dheri lagama sameyn karin. Hadaba waxaa dhacday in Eyladii ay u tageen nin wadaad ah oo ay aad uga dambeeyaan oo la dhihi jiray "AW Muumin". Markey arintii u sheegeen wadaadkii wuxuu kula taliyey in ciiddu ay u baahan tahay dhiig dadeed !

Aw Muumin wuxuu yiri hadii aad dooneysaan ciiddu inay idiin wanaagsanaato waa in gabar oas oo ka dhalatay qolada la yiraahdo (reer dooy) lagu gowracaa ciidaas, gabadhuna waa in ay x ahaatea mid aan jirkeedu weli la taaban oo 14 jir ah. Qolada la yiraahdo reer-dooy oo ka mid ah Eylada markaas waxey deganaayeen meel xoogaa u jirta B/heybe oo la yiraahdo (Yaaqleedè) .
Waxaa la yiri markii Eylada hadalkaas loo sheegay inay u tageen nin Reer-Dooy ahaa oo dhalay gabar calaamadihii loo soo sheegay wadata, magaceedana waxaa la oran jirey RAAMA GADUUDE". Ninkiibay ka baryeen gabadhii , wuuna u ogolaaday. Shuruuda kale waxay ahey(d) gabadha waa inuu gowracaa wiil dhllinyaro ah oo gayaankeeda ah.

FARSAMADA UGAARSATADA




AWEES ABBA

Gabadhii markii lagu gowracay/ciidii waxaa la sheegay inay wanaagsanaatay wixii markaa ka dambeeyey, waxaana loo bixiyey "Heybì", buurtana ayada ayaa loogu magacdaray oo kolkii hore waxaa la dhihi jirey (Buur-Eyle).Dherida marka ciidaa iyada ah laga sameeyo waa la dubaa, waxayna yiraahdaan hal kudhegga ah (Ay Raama-Gaduudaay Ilaahoow Beec Iinki sehel), taasina waxay na tuseysaa inay wax ka jiraan arintaas. Dherida meel walba waa looga iman jirey, meel walbana waa loo iib geyn jirey ka dib markii la ogaaday inay leeyihiin waxtar badan.

Xilligii Gumeysiga

Ugaarsatadu markii ay soo saareen farsamada dheri sameynta aad baa looga dabadhacay, waxeyna yeesheen sumcad weyn. Farsamadoodu intaa kuma ekeyne markii dambe waxay sameyn jireen ashuumo biyaha lagu shubto iyo burjikooyin si ay ganacsi fiican u sameystaan, waxyaabahaas oo idilna waxey ka sameyn jireendhoobo.

Xilligii gumeysiga waxeynu ogsoonahay inay jireen qabiilo iyo nabadoono ujeedada ka dambeyseyna ay aheyd in umadda Soomaaliyeed lagu kala qeybiyo. Markaa qabiil walba nabadoono ayuu lahaa oo la ogsoon yahay. Ugaarsatadii ku nooleyd B/Heybe inkastoo ay lahaayeen odayaal maamula hadana ma aheyn kuwo la x aqoonsan yahay, sababtuna waxay aheyd ayagoo loo arkayey dad la yasaayo. Waxeynu hore u soo sheegnay in ugaarsatadu xilligaan ay ahaayeen dad ahlu-diin ah oo xoolo iyo beero leh iyo farsamo, intaa waxaa u dheeraa ugaarta ay soo dilaan haragooda oo ay ka sameyn jireen Jiimbaaro, Gambaro, iyo galka seefaha la geliyo IWM.

Ugaarsatadii markii dambe waxay isku dayeen sidii ay xx sumcad ugu yeelan lahaayeen qabiilooyinkii markaas jiray. Waxaana la sheegay in ay u yeerteen nin wadaad ahaa oo markaas joogey Afgooye waxaana la dhihi jirey ( Sheekh Gurey). Waxeyna ku yiraahdeen waxaan dooneynaa inaad noo noqotid suldaan maadaama aad tahayxx shiikh caalim ah oo diinta aad ugu dheer; xxxxxxx

Wadaadkii waa la caleemo saaray, waxaana loo aqoonsaday suldaanka Eylada, wixii dhibaatooyin ah oo ka dhaca dhexdooda asaga ayaa xallin jirey. Shiikh Gurey waxaa la sheegay inuu ka dhashay qolada la yiraahdo "Goobroon" ee dega Afgooye, waxeyna u soo kaxeysteen si loogu aqoonsado maadaama taliskii markaa jiray uu ku dhisnaa qabiil iyo goboleysi.

Waagaas waxaa la sheegay inay jireen dagaallo ay isaga horyimaadeen ugaarsatada iyo qolada la yiraahdo Eelaay oo deganeyd B/xakaba. Weerarkana waxaa bilaabay Eelayda, ujeedadooduna waxey aheyd inay qabsadaan beerihii ay lahaayeen ugaarsatada ~~ixix~~ isla markaana ka qaxiyaan meesha ay deganaayeen oo aheyd B/heybe. Dagaaladaas dhiig badan baa ku daatay, ugaarsatadii waa laga gacan sareeyey beero badana waa laga qabsaday.
Ugaarsatadu waagaas waxay dagaal kula jireen Gaaljecel oodeganaa B/Heybe hareeraheeda, si ay uga aargutaan dhibaatooyinkii ay u geysan jireen ugaarsatada.

## CUTUBKA LABAAD

### DHAQANKA UGAARSATADA :

Ugaarsato waxaa loo yaqaanaa dad hawshoodu tahay inay dabtaan ugaarta ayagoo istiomaalaya qalab lagu yaqaan howshaas x oo ah qaanso iyo falaaro iyo mariid. Ugaarsigu wuxuu ka mid ahaa waagii hore waxyaabaha nolosha lagu badbaadiyo kan ugu horeeya, wuxuuna soo maray heerar kala duduwan. ~~Hxg~~ Ugaarsigu wuxuu bilow-day waqtigii bidaa'iga (primitive era) oo dadku xoolaha aan waxba dhaamin, wuxuuna gaaray heer uu ku fido aduunyada oo dhan. Lama oran karo ummad hebel ayaa ugu horeysay ugaarsiga laakiin waxaa hubaal ah in ummad walba ay soo martay heerkan.

Hadaan u soo laabano Soomaaliya waa hore ayaa laga istiomaali jirey ugaarsiga meelaha qaarkood sida B/Heybe iyo goobo kale oo ka mid ah dalka. Dadka ku nool B/heybe noloshooda oo dhan waxay ku dhisneyd ugaarsi inkastoo qaarkood ay iska daayeen oo hawlo kale yeesheen hadana weli waa istiomaalaan. Buur-Heybe waxaa ku nool qolooyinka la kala yiraahdo Eylo-Jafaay iyo Eylè-Buur. Kuwa ugaarsada ayaa loo yaqaanaa EYlo-Jafaay, welina waxey sitaan hidihii iyo dhaqankii ay lahaan jireen.

## Herintu Sidey U Dhisan Tahay ?

HERIN : waa bool ugaarsato ah, isla xeerna ku dhaqanta, hormuudna uu u yahay Hargaanti, oo wada Adeeosan. Herintu waxey ka kooban tahay dhowr qeybood oo leh darajooyin kala sareeya; qaybahaasina waxey kala yihiin :-

1) Hargaanti
2) Hargaanti-Guul (ku xigeen)
3) Qowse (kariye)
4) Ul-Dhexe
5) Uunleey ama (Deebaad)

Hargaanti : Howshiisu waxey tahay herinta oo idil ayuu mas'uul ka yahay, amarkiisa ayaana la raacayaa. ~~KKkgxxx~~ Herintu markey ugaarsi aadeyso isagu badanaa ma raaco, falaaraha ay markaasi wax ku dilayaan ayuu mariyaa mariid, waayo asaga ayaa u haya mariidka herinta oo idil. Haddii ugaar la soo dilo marka la qeybinaayo isagu qeybtiisu waa gaar, fadhigiisa ayaana loogu geeyaa wixii dhibaatooyin oo ka dhex dhaca herinta dhexdeeda asaga ayaa xalinaayo.

Hargaanti-Guul : waa ku xigeenka hargaantiga, ~~kxxkxx~~ howshiisuna waxey tahay inuu maamulo herinta hadii hargaan-~~gx~~-tigu maqan yahay oo meelo kale uu aado ama uu jiran yahay, waxaana magacaabo hargaantiga. Haddii ugaar la soo dilo hargaant-Guulku wuxuu leeyahay qeyb ka yar tan hargaantiga, isaga ayaana hogaamiya horinta marka ugaarsi la aadaayo.

Qowse : isna waa kaaliyaha hargaantiga, hawshiisuna waxay tahay inuu qeybiyo ugaarta la soo dilo, cid kale ma qeybineyso aan isaga aheyn qof walbana wuxuu siinayaa inta uu saami u leeyahay. Hadii herinta ay duceysaneyso isaga ayaa kariya cuntada, waxaana loo yaqaanaa kariyaha herinta. Ugaarta la soo dilo wuxuu ku leeyahay qeyb ka yar tan hargaantiga sida Hargaanti-Guulka. Qowse isaga waa sabajoog oo ugaarsi ma aado.

**Ul-Dhexe** : waa koox ka kooban qiyaastii 20-30 qof, howsha badan-keedna ayagaa qabta. Waa koox aad iyo aad u tababaran shaqadooduna tahay ugaarsi keliya. Haddii ugaar ay soo dilaan dhamaantood waxey leeyihiin qeyb isku wada mid ah oo ka yar tan Qowse. Hadii qof Ul-Dhexe ka mid ah uu xamuunsado qeybtiisa waa loo geynayaa.

**UUNLEEY** : oo ah kooxda ugu dambeysa waxaa ka mid noqonaya qof kasta oo herinta ku soo biira. Kooxdan waxaa kaloo loo yaqaanaa (Deebaad) oo ah shimbir magaceed, sababta loo yirina waa wax sheegsheegooda oo badan.

Uunleey waa koox ku jirta tababar ugaarsi iyo iney bartaan sharciyada u dejisan herinta taasoo ah kala dambeynta iyo ixtiraamka waayo waxay u badan yihiin dhalinyaro , caruur iyo haween.

## Sidee Looga Mid Noqdaa Herinta ?

Herin walba waxay ka kooban tahay qaybahaas aan soo sheegnay iyadoo uu hogaaminaayo Hargaanti. Hadaba qofkii raba inuu ka mid noqda herinta hargaantiga ayuu u sheegayaa arintiisa, waxaa la amrayaa inuu keeno dheri cambuulo ah oo aan bun laheyn, hargaantiyaashu badanaa bunka ma cunaan waayo waxey u heystaan xijaab. Dheriga cambuulada ah waxey u yaqaaniin (Yuunge), ujeedada laga leeyahayna waxey tahay in ninka loogu duceeyo taaso ay u yaqaaniin (Carab-Marin). Ninkii ku soo biiraayey herinta markuu keeno cambuuladii oo la cuno, tahliil ayaa loo tufayaa markaa herinta dhexdeeda ayuu fariisanayaa tahliishii ayaa 3 jeer madaxiisa korkiisa lagu wareejinaayaa ka dibna waxaa la leeyahay cab. Hergaantigu ninku wuxuu u fasaxayaa inuu ugaarto ama ka mid-noqdo herinta. Ninka marka ugu horeysa haduu ugaar soo dilo wuxuu u keenayaa hargaantiga markaasaa lagu dhawaaqayaa :
( Lankuun Uunkoo Hal KU Tobiyooy), taasoo micnaheedu yahay in ninkaan uu ka mid yahay qeybta Uunleeyda.

Ninkii markuu mudo joogo oo tababar fiican qaato,haduu rabo inuu ku biiro Ul-Dhexe hargaantigu wuxuu leeyahay hadana ninkii inuu keeno dibi 3 jir ah. Hadii xoolo uu qabo ninku wuu keenayaa, haduusan qabina uunleey ayuu ahaanayaa weligiis. Ninku marka uu keeno neefka waa la gowracayaa oo herinta oo idil ayaa ku duceysaneyso. Marka la cuno neefkii hargaantigu wuxuu ku dhawaaqayaa in ninku ka mid yahay qeybta Ul-Dhexe. Ninkii markuu ka mid noqdo qeybtaas wuxuu helayaa saami ka badan kii markii hore uu qaadan jirey hadii ugaar la soo dilo.

Cabaar markuu ahaado ul-dhexe,haduu rabo inuu noqdo hargaanti-guul hadana waxaa la leeyahay keen dibi 3 jir ah. Neefkii waa loogu duceynayaa, waxaana loo sheegayaa inuu noqday hargaanti-guul. Markuu nodo hargaanti-guul hawshii badneyd uu qabanaayey ayuu ka nasanayaa, hargaantiga uunbuu dabasooonayaa. Hadii ugaar la soo dilana qeybtii hargaanti-guulku qaadan jirey ayuu qaadanayaa. Markan haduu rabo inuu noqdo hargaanti dibi kale oo 3 jir ah ayuu bixinayaa.Markuu noqdo hargaanti horinta wuu ka baxayaa oo horin kale ayuu sameysanayaa uu isagu mas'uul ka yahay.

Qof/walba oo raba inuu noqdo hargaanti heerarkaas kala duwan ayuu soo marayaa iyadoo ay ku xiran tahay qof walba xoolaha uu qabo iyo inta uu bixiyo. Qofkii aan xoolo qabin isagu uunleey ayuu ahaanayaa oo ah qeybta marka wax la qeybsanaayo ugu yar.

XEERARKA UGAARSATADA

Horin walba waxey leedahay xeerar u gaar ah oo aan la jebin karin, qofkii raaci waayana uu muteysanayo ciqaab kulul. Dambiyada qaarkood looma dulqaadanaayo,~~xxxfka~~ qofkaa horinta oo idil ayaa laga saarayaa waana la takoorayaa; cid la hadli karta ama wax siin karta ma jirto ayuu leeyahay hargaantigu. Dambi yar haduu galo qofka waa la xeerayaa oo wixii lagu xukumo ayuu bixinayaa.Xeerarka u degisan herintu wuxuu yahay sidii ay wada-jir wax u ugaarsan lahaayeen una qeybsan lahaayeen wixii ugaar ah oo ay soo dilaan oo qofba ka kale wax uga qarsan waxna u dhimin.

Haddii qof horinta ka mid ah uu isku dayo inuu keligii ugaarsado ciqaabtiisu waxay tahay in laga saaro horinta oo idil, isagoon wax digniin ah la siin. Qofkii markaa waa dhibaatoonayaa maadaama laga takooray dadkii ay wada noolaayeen. Sida keliya ee dambiga looga cafinaayo waxay tahay inuu keeno neef geel ah, islamarkaasna uu hargaantigu dambi dhaaf weydiisto. Sidoo kale hadii ruux uu dilo ruux kale oo horinta ka mid ah waxaa lagu xukumayaa inuu bixiyo dhiigga, haduu bixin waayana horinta ayaa laga saarayaa, lamana cafinaayo ilaa uu bixiyo dhiigga.

Dambiyada kale ee la galaa oo ay ka mid yihiin, hadii qofku uu been sheego, khaa'in noqdo ama ay isdagaalaan qof kale oo horinta ka mid ah waa la xeerayaa ruuxaas, waxaana lagu xukumayaa inuu keeno dibi 3 jir ah, haduu yahay qofku mid aan xoolo qabin waxaa la leeyahay keen 24 digaag, haduusan qabina digaaga waxaa la amrayaa inuu keeno 7 dheri oo cambuulo ah.

Hadii qofku uu ka maosiyeysto naag uu qabo qof kale oo horinta ka mid ah waxaa lagu xukumayaa in ilaa mudo 3 todobaad ah qaybtii uu xaqa u lahaa la siiyo ninka kale si loogu samirsiiyo. Hore waxaa jiri jiray sharci ah ruuxii naagtiisa uu ku arko ruux kale inuu dilo, islamarkaana wax dhiig ah aan la weydiin. Hadaba halkaan waxaan ka garaneynaa in horinta oo idil xukunkeedu uu yahay badanaa cunno, sababtuna waxay tahay dadku waxay u badan yihiin dad xoolo yar qaba, hadaba hadii uu dambiyo badan galo xoolihii yaraa ayaa ka dhamaanayo sida looga cunaayo, markaa qof walba wuxuu iska ilaalinaayaa inuu dambi galo. Xukunkana mar walba waxaa bixiya hargaantiga.

## Sida Loo Ugaarsado

Ugaarsatadu markey ugaarsi aadayaan habeenkii ayey shir qaataan, waxeyna go'aansadaan x meeshii ay aadi lahaayeen; hargaantiga ayaa duceynaayo markaas, wuxuuna leeyahay:

Aflal guba, Afoownaa,
Iimaanula, Aafitiinyì,
Hor aloow noo kaal,
Reed aloow noo kaal.

Intaa ka dib herinta aroortii hore ayey kacayaan iyagoo qalabkii ay ku ugaarsan lahaayeen uu u dhan yahay, Dhamaantood waxay si wadajir ah ugu dhawaaqayaan erayadan soo socda:

Booneey Boon, Boontaa Liibaan,
Uur alaa meel li galè leh,
Dhiiggì dhulkè, Dheoaankì dherigè
Dheefti Dhal Booneed.
Boonkii duuli wal laan, heer
Inkooynì, ay luku fadee Hooy!
LIIBAANTEEY !

Ugaarsatada waxaa u oaado ah in xaasaskooda ay ku xxxxx amraan inay iska furaan baraarta (tinta xiran)ialaa ay ka soo laabanayaan,; sababtuna waxay tahay hadii aan la yeelin sidaas ugaar badan ma soo helayaan ama ugaarta ay ku dhuftaan falaarta ayaa ka baxsaneysa ayey aaminsan yihiin, qofkii lagu qabto arint-aas xaaskiisa waa la xeerayaa. Ugaarta ay dabtaan waxaa ka mid ah Sagaarada, Geriga, Bicildka, Deerada, Goodirka, Garanuugta, Goroyada, Wiyisha, Cawsha(eelo) iyo Dagiiranka.

Marka laga reebo geriga ugaarta kale waxey ugu xushmeeyaan Sagaarada, sababtuna waxey tahay sagaaradu mariidka badanaa ma dilo sidaa darteed waxay aaminsan yihiin inay tahay ouradka ugaarta oo dhan. Ruuxa marka uu baranaayo ugaarsiga waa inuu marka hore dilaa sagaaradaxxx looma ogola inuu dilo ugaar kale iyadoo sagaaro xy loo jeedo ,arintana waa oaado.

Sagaarada iyo dagiiranka ayaga si sahal ah ayaa loo dabtaa, waxaana loo isticmaalaa shabaq ay labada dhinac kaga jiraan laba qori markaasaa dhulka lagu taaggaa. Ugaarsatada qaar sagaarada ayey u soo eryaan dhinaca shabaqa ayagoo ka maraayo hareeraha, qaarna shabaqa dhinacyadiisa ayey joogaan oo markey ku dhacdo shabaqa ayey qabanayaan. Mararka qaarkood intay isleeyihiin shabaqa ka saara sagaarada ayey ka baxsaneysaa, sidaa darteed si ayan taasi u dhicin iyadoo shabaqa ku jirta ayey garaacaan waxeyna dhahaan halku dhegga ah:
( Booboodii Boonkaa Lè , Bogtaadii Biliskaa Lè).

Ugaadha kale sida ay u dabtaan waxey tahay, tusaale hadii la arko Biciid, nin ayaa soosooconaya oo istusaya biciidka, kuwa kalena meel fiican oo ay wax ka dili karaan ayey ku dhuumanayaan. Kolkaa biciidkii markuu arko ninkii wuxuu u cararayaa xx xagii kuwii kale, markaasey ayaguna ku tuuraan falaarta mariidka leh, weyna ersadaan ilaa ay ka arkaan raqdiisii. Hadii uu neefku bakhtiyo xataa wey cunaan waayo waxay leeyihiin bir baa ku jirta. Waxaa caado ah u ah in qof walba qalabkii uu watay oo ah qaansada iyo falaaraha ay dul dhigaan ugaartii la dilay dusheeda , kolkaasey qaadaan hees amaan ah sida tixdan:

Orki wal kii Dhawee,
Ararè wal kii Gagaabiyee,
Arfiileey Awreen Islijernooy;
Agoon ooyti wal kiin Afqaadeey,
Aduud Adii in Reebtii.
Gol abaareylè giirtaa galab-galabowlè
Kii kiin goronì gedaalaa koo maree,
Aniini hoobè adì likiin Gooriyaanì
Gololeey mi toosin.

## Ugaarta La Dilo Sidee Loo Qeybsadaa ?

Ugaarsatadu kolkay ugaarsi aadaan waxay soo dilaan ugaar badan oo isugu jirta noocyo badan. Ugaartaas waa la soo qaadayaa waxaana la keenayaa hargaantiga gurigiisa halkaasoo lagu qaybiyo. Hilibka waxaa qeybinaayo Qowse oo isagu hawshiisu tahay wuxuuna u kala dhidhigayaa qeybo badan.
Hargaantigu wuxuu leeyahay tagoog iyo legga, hargaanti-guulkana wuxuu helayaa tagoog keliya, Qowse wuxuu leeyahay shafka,ul-dhexe waxay helayaan qeybo isku wada mid ah. Uunleey aygu waxay leeyihiin qeybta ugu yar, waxayna qeybsadaan ugaarta yar yar sida sagaarada iyo dagiiranka IWM.
Qofkii neeka dilay waxaa la siinayaa haragga,madaxa, caloosha oo qeybtiisii xaqa uu u lahaana ay u dheer tahay.

Hore waxeynu u soo sheegnay in ugaarsatadu ay ugu jeceel yihiin ugaarta sagaarada,waxeyna yiraahdaan dilida sagaarad waxey sharaf u tahay ugaarsadaha, taariikhdana waxaa lagu hayaa ruux geel ku iibsaday sagaaro jaceylka uu u qabo keliya.

### Qalabka Lagu Ugaarsado

Waagii hore ugaarsatadu ma laheyn qalab wanaagsan oo ay ku ugaarsadaan, waxeyna isticmaali jireen gamuun la qoray oo aan bir laheyn iyo eeyo keliya. Markii dambe waxey sameysteen gamuuno biro leh, waxayna barteen sida loo sameeyo mariidka waayo waagii hore waxaa looga keeni jirey Itoobiya.
Qalabka ay isticmaalaan ugaarsatada waxaa ka mid ah :
mariidka, shabaq, eeyo, qaanso iyo falaaro kala nooc ah.
Falaaraha ay isticmaalaan ugaarsatadu waxey u qeybsamaan 3 nooc:-
1) Gabas (Dhegaleey) : Waxey leedahay af ballaaran iyo dhego gadaal u rogan, waxaana lagu dilaa duurjoogta waaweyn sida; Geriga, Libaaxa, Maroodiga IWM. Waa midda ugu weyn uguna adag falaaraha ay isticmaalaan ugaarsatadu.

## NIN UGAARSADE AH OO UGAAR DABAYA.



2) <u>Cidi-gariir</u> : sida Gabasta oo kale ayey u sameysan tahay, laakiin wey ka yar tahayx waxaana lagu dilaa ugaarta caadiga ah sida; Garanuugta (eelè-èd), biciidka, Deerada (dardiir),Goroyada, Cawsha (eelè-gaduud) iyo Goodirka.

3) <u>Dabbaan</u> : waa mida ugu yar falaaraha ay istiomaalaan, iyadu ma laha cirifyo oo waxay leedahay caarad dhuuban oo siman, waxaana lagu dilaa ugaarta yaryar sida; Sagaarada, Dagiiranka,Kashiite X (Caano-qub) IWM.


Qaansada iyo boqonka ay istiomaalaan isku si ayey u sameysan yihiin, waxa keliya ay ku kala duwan yihiin waa dhererka iyo dhumucda. Qalabka kale ay ugaarsatadu istiomaalaan waxaa ka mid ah Shabaq oo ay u adeegsadaan sagaarada waayo badanaa mariidka ma dilo islamarkaana baxsashadeeda oo badan . Waxey kaloo ugaarsatadu adeegsadaan eeyo,kuwaasoo caawiya una fududeeya hawsha ay qabanayaan. Qoys walba wuxuu qabaa dhowr eey oo markey ugaarsi aadayaan raaca si ay wax u soo dilaan iyagana.

## MARIIDKA IYO SIDA LOO SAMEEYO

Mariidka ama (Waabaanyo) waa kan ugu muhiimsan ay ugaarsatadu istiomaalaan waana sun hadey gaarto dhiigga nafleyda dhakhso u dileysa. Marka la fiiriyo qalabka iyo xeeladaha ay istiomaalaan ugaarsatadu mariidku kaalin weyn buu ka qaataa, isla markaana u fududeeyaa hawshoodii aheyd ugaarsiga . Mariidku markii hore Itoobiya ayaa looga keeni jiray ugaarsatada, dameero inta lagu soo raro ayaa B/Heybe la keeni jirey, markii dambena sida loo sameeyo ayey barteen.

Mariidka waxa laga sameeyaa geedo ka baxa dhul carro guduud ah sida Luuq, Yurkud(tuulo ka tirsan Deg. Luuq) iyo meelo ka mid ah gobolka Hiiraan, dhowr nooc ayeyna u kala baxaan waxaana ka mid ah Mukayga. Geedahaas waxay leeyihiin calaamado u gaar ah oo lagu garto,waxaana ka mid ah astaamahaas;

# QALABKA UGAARSIGA LOO ADEEGSADO



Shimbir la yiraahdo (Fiitaneey) ayaa badanaa cunta miraha geedahaas markey cunto durbadiiba hore ayey ka dhimaneysaa oo waxaad arkeysaa shimbiro badan oo geedka hoostiisa yaalla oo dhintay. Hadaba mariidka wanaagsan geedahaas ayaa laga sameeyaa, kuwa kale laguma arko shimbir hoos jiifta sidaa darteed si fiican wax uma dilaan .

Geedkaas xididkiisa, xabagtiisa ama qolfooftiisa ayaa la soo guraa ka dibna dheri inta biyo lagu shubo ayaa lagu ridaa, waana la kariyaa. Muddo ku siman 7 beri ayuu dabka saarnaanayaa, markaas ka dib toxobta sare ayaa laga qaadayaa. Toxobtii ayaa haddana mar labaad la karinayaa ilaa midabkeedu uu isu bedelo madow, kolkii horena wuxuu ahaa casaan. Waxaa lagu tijaabiyaa carrabka oo marka lagu taabto durba adkaada,markaas ka dib mas weyn oo la yiraahdo (Haldheji) oo sun ah midabkiisuna yahay caddaan xididadiisa xidid ka mid ah iyo rah la yiraahdo (Boqol-Soon) ayaa inta toxobtii madoobeyd lagu daro leysku karinayaa mar seddexaad. Markaa qaabkeedu wuxuu noqonayaa sida laammi (daamur) la karkariyey oo kale, markana waxa lagu tijaabinayaa diiq ayaa inta la soo qabto la marinayaa mariidkii, isla marka la mariyo waxaad arkeysaa diiqii oo baalashiisii oo dhan ay taagtaagmeen oo hore ka dhintay. Waxaa kaloo lagu tijaabiyaa mariidka wanaagsan inta weel aan dabool laheyn lagu shubo ayaa la saaraa dameer, mudo yar ka dib waxaad arkeysaa dameerkii oo ay timihii ka madheen ama ka baaba'een. Hadaba mariidka sidaas ayaa loo sameeyaa isagoo u kala baxa dhowr nooc.

Mariidku wuxuu u kala baxaa laba nooc:

1) Mishaariyeey iyo 2) Qoqob .

Mishaariyey waa kan mar dhow la sameeyey oo haddii dhiigga ugaarta uu gaaro rugtiisa aan ka dhaqaajin, isla markaana neefku waa gariirayaa waana shubmayaa, goobta uu joogo ayuu isla markiiba ku dhimanayaa. Mishaariyey wuxuu u eg yahay sida laami la kariyey oo dhalaashan.

Nooca kale ee mariidka oo loo yaqaano Qoqob waa marka uu mariidku yaalo muddo badan, wuxuuna u eg yahay laami adag oo qolfo yeeshay. Dhaqso uma dilo ugaarta loo adeegsado noocan, waxeyna ku qaadaneysaa cabaar inuu dilo neefka.

Ugaarsatadu waxey leeyihiin heeso u gaar ah oo ay ku ammaanaan mariidka waxaana ka mid ah tixdan soo socota :

Malabooy Awriinli Sheenayoow,<br>
Uduu ku Sheenti Ugaartii, Malaboodeey,<br>
Madoo waa li Miiri, Midibkaa is Bedeleey,<br>
Midoowaateey,<br>
Dhulkaa Liki Miiri, Mahalsheeyaa Gediidì,<br>
Afkii Mandì ku Sheenti,<br>
Mayaan Miin Damboöytoo,Malaboodeey Awriili,<br>
Roronaa ahaa mì Roori Koroo,<br>
Adii oo Roonì Ragdì iinki Reeb .

## Sida Ay Isu Guursadaan Eyle-Jafaay

Hore waxaynu u soo sheegnay in ugaarsatadu ay caado u lahaayeen markey isguursanayaan ay ku wareegsan jireen jireen geed sedax jeer oo markaa wiilku gabadha iska kaxeysan jirey. Caadadaas waa isbedeshay markii ugaarsatadu ay kala jabeen , Eyle-Jafaay weli waa ugaarsato waxaadna moodaa in caadadaas aan soo sheegnay ay ku dambeeyaan inkastoo ay iska daayeen geed ku wareegsashadii. Ninka Jafaayda ahi gabadha uu guursan rabo wuxuu soo doontaa isla marka ay dhalato gabadha oo umusha lagula jiro. Gabadha inta umusha lagula jiro ruuxii ugu horeeya ee soo doonta ayaa la siiyaa, markaa wixii ka dambeeya asaga ayaa korsanaayo oo cidna uma u korineyso. Gabadha ruuxii laga balan qaaday mooyee qof kale lama siin karo, gabadha waalidkeedna waxey ku amrayaan ninkaas inuu keeno maalin walba raashinkeeda iyo dharkeeda inta ay ka koreyso. Sidaa darteed ugaarta uu soo dilo maalin walba qaar ayuu u keenaa reerka gabadha isagoo aan laga rabin lacag iyo masaruuf kale.

Gabadha markey gaarto 4 jir ninkii waxaa la leeyahay markaan naga kaxayso islaantaada oo korso. Ninkii gabadhii ayuu soo kaxeysanaayaa oo gurigiisa ayuu geysanaayaa si ay raashinka ugu kariso, mararka qaarkoodna ugaarsi ayey isu raacaan si ay u caawiso ninka. Meel walba oo ninku aadayo wey raaceysaa oo guriga ugama tago keligeed. Haddii ay jiraan cayaaro sida maalinta buurta la fuulaayo waxay ka qeyb galaan cayaarahaas, gabadhii yareyd ayaad arkeysaa iyadoo la ciyaareysa niman waaweyn ama sacabada u garaaceysa heeseysana.

Gabadhu markey qaangaarto xaflad cayaar ah ayaa la qabanayaa, ninkiina gabadhii ayuu la aqal galayaa ,badanaa waxey la aqalgalaan gabdhaha iyadoo 13 jir ah. Hadaba Eylo-Jafaay caadadaas ayey leeyihiin oo ay isku guursadaan.

NinkaJAFAAYDA AH XAASKIISA
ASAGAA KORSANAAYO



Labada qolo ee ugaarsatada ah wax xiriir ah kama dhaxee-yo ,ismana guursadaan maxaa yeelay Eyle-Buur wey yasaan qolada Jafaayda ah waxeyna yiraahdaan caadadii hore ayey weli haystaan, isla markaana bakhtiga ayey cunaan, sidaas darteed labada qolo magaca Eylè maahee wax kale oo ay wadaagaan ma jirto .

## Habka Guurka Ee Eyle-Buur

Eyle-Buur waa qolo ka mid ah Eylada laakin aan hadda ugaarsato aheyn. Hore waxaynu u soo sheegnay in asalkoodii hore ay ahaayeen ugaarsato, markii dambe diinta islaamka ayey si fiican ula qabsadeen hawshii ugaarsigana wey iska daayeen ka dib markii ay sameysteen beero iyo farsamada dheri sameynta oo ay barteen. Hadeynu fiirino habka ay isu guursadaan, aad buu uga duwan yahay habka Eyle-Jafaay waxeyna leeyihiin xeerar gaar ah .

Gabadha markey tahay inan waxey madaxa ku leedahay shuruf (Dhoor), maradana waxey ku xirataa naasaha dushooda taasoo cadeyneysa iney tahay inan oo aan weli la guursan . Eyle-Buur waxa kaloo ay caado u leeyihiin in iyga dhexdooda ay isguursadaan. Inanta ayadoo yar ayaa loo sheegayaa ruuxii guursan lahaa haduu noqon lahaa ina adeerkeed ama ina abtigeed ayadoo aan wax xoolo ah lakala qaadaneyn. Inanta markey qaangaarto waxa lagu nikaaxa-yaa inankii loo dooray, mudo yar ka dibna wey aqalgalayaan . Labada waalid markaa si wadajir ah ayey gacan uga geysanayaan aqalgalkooda, wiilkana waxaa loo ogol yahay in gabadha uu geysto reerkooda.

Reerka gabadha Hoori( aqal Soomaali) ayaa waxey ka dhisayaan meel banaan ah oo aan reerka u dhaweyn, waxaana loogu talagalay in wiilka iyo gabadha ay todobada ku galaan. Waxeyna joogayaan halkaas mudo 14 maalmood wixii cuno ahna meesha ayaa loogu geynayaa, lamana ogola inay cid kale u tagto oo aan ka aheyn kuwa raashinka geynaya .


Inanta markaa wixii ka dambeeya waxey madaxa saaraneysaa shaash (Masar), waxey noqoneysaa ceeb hadii la arko ayadoo madaxeedu aan daboolneyn. Mudada markey u dhamaato waxaa la ogol yahay booqashada asxaabtood markaas waxaa bilaabanaayo cayaaro iyo mashxaradeyn isdabajoog ah oo aan laheyn mudo u go'an. Waxaa caado ah in arooska cusub ay degaan mudo sannad ah reerka gabadha halkaasoo loogu talagalo aqal ayaga u gaar ah. Mudada sanadka ah markey dhamaato wiilkii waxaa loo ogol yahay in gabadha uu u kaxeysto reerkooda wixii markaa ka dambeeya.

Gabadhu hadey yeelato uur, markey mareyso bisha 8daad waxey imaaneysaa reerkooda halkaasoo loogu sameeyo madax-shub, ilaa ay ka dhashana reerkooda ayey joogeysaa, markay umusha ka baxdo hadana waxaa lagu soo celinayaa reerkii wiilka.
Eyle-Buur ayagana habkaas aan soo sheegnay ayey isu guursadaan.




QOYSKA CUSUBEE EYLE-BUUR (HOORI) AYAA DIBADA LOOGA DHISAA.

CAYAARTA BAAL-DOORIYOW



## CUTUBKA SEDDEXAAD

### DADKA KALE EE KU NOOL BUUR-HEYBE

Waxeynu hore u soo sheegnay in ugaarsatadu ay u kala jabtay laba qeybood kuwaasoo kala ah :
Eyle-Buur iyo Eyle-Jafaay.

1) Eyle-Buur waxaa loo yaqaanaa kuwa hadda ku nool B/Heybe isla-markaana dhaqankii iyo caadooyinkii hore u lahaan jireen baabi'-yeen oo kuwo cusub sameysteen. Ugaarsigii ayey iska daayeen , waxeyna noqdeen beeraleey iyo xoolo dhaqato, waxeyna ku dhaqmaan diinta islaamka caqiidadeeda, sharciyadii adkaana wey iska daayen. Farsamo cusub ayey soo saarteen taaso ah dheri sameynta iyo haragga xoolaha oo ay ka sameeyaan jiimbaarro, gambaro IWM. Nolo shoodu waa caadi, welina waxey ku nool yihiin dhulkii ay ku noolaan jireen awoowayaashood ee B/Heybe.

2) Eyle-Jafaay waa kuwii markii adoonsigu soo day ka cararay dhulkoodii,qaarkood markii ay nabadu dhacday ayey ku soo laabteen dhulkoodii qaarkoodna diba uguma soo noqon oo meelo kale ayey degeen. Eyle-Jafaay weli waxey sitaan dhaqankii iyo caadooyinkii ay hore u lahaan jireen oo awoowayaashood ay ka dhaxleen, wax isbedel ahna kuma dhicin oo weli waa ugaarsato .

Afka maayda (Jaf) waxaa loo yaqaanaa duurka ama jiqda, hadaba Eyle-Jafaay maadaama ay yihiin ugaarsato,had iyo jeerna ay duur ku jir yihiin ayaa loo bixiyey Jafaay. Waxaad moodaa in waagii hore ay ka qalab wanaagsan yihiin hadda waxaana u dheer Dabino, Waramo iyo Gaashaan isla markaana farsamada dabida ugaarta ay aad ugu horeeyaan. Malaha deegaan u gaar ah hadba meeshii ay doonaan ayey iska degaan oo ay isleeyihiin waxbaad ka heleysaan . Waxaa la sheegay in Jafaayda ayan aheyn dad xaga diinta u fiican sababtoo ah waa duur ku jir cidna wax kuma darsadaan oo weli koox koox ayey u soodaan,dhaqankoodii hore ayey sitaan .

Hadaba labada qolo waxaa in mudo ahba ka dhex sooday iska horimaadyo badan taasoo keentay inay kala go'aan. Arintaasna waxaa sabab u ahaa Eylo-buur ayaa waxay dooneysay inay ka dhaadhiciso qolada kale inay iska daayaan ugaarsiga faraha badan oo ay ku dhaqmaan caqiidada islaamka si ay u midoobaan. Arimahaas ay soo jeediyeen odayaasha Eyle-Buur ma aheyn kuwo ay ku qanceen qoladii kale, waxeyna yiraahdeen ugaarsigu ma aha wax goor dhow aan bilownay ee waa wax aan ka dhaxalnay awoowayaasheen oo weligood ku soo dhaqmi ~~jirey~~ jireen, mana dhaafeyno wax doonta hala sheegee maxaa yeelay nolosheena oo dhan ayaa ku dhisan. Taladaa aad soo jeediseen maha mid noo soconeysa annaga, ayadoo ay sidaa tahay anaga weli waxaan idiin heysanaa dad walaal ah ayey ku jawaabeen Eyle-Jafaay.

Eyle-Buur markaa wixii ka dambeeyey waxay ballan ku qaadeen ineyan sheegan Eyle-Jafaay, isla markaana wax xiriir ah uusan dhexmarin. Ismana guursadaan ilaa iyo hadda, ruuxii gabar Jafaay ah guursadana waa la dayrinayaa. Qolo walba nolosheeda caadiga ah ayey ku nooshahay, waxna iskuma darsadaan. Dadka Eyle-Buur waxay isu haystaan inay yihiin ka ilbaxsan kuwa kale, isla markaana la tartamaya qolooyinka kale ee ku nool B/H.

B/Heybe waxa kaloo ku nool qolada la yiraahdo Gaaljecel oo ah qolada kale ee ugu badan meesha marka laga reebo Eylada. Markii hore waxey ka yimaadeen Hiiraan, Markey arkeen in meeshu ay daaq wanaagsan tahay ayey degeen, beerana ka sameystaan.


Qolada kale ee deggan B/Heybe waxaa la yiraahdaa (Shaanshiye), hawshooduna waxey tahay ganacsadayaal, dukaamo ayey ku leeyihiin weyna deggan yihiin. Qoladan waxaa la sheegay in asalkoodu ay ahaayeen (Asharaaf) oo deganaa Marka iyo hareeraheeda, hawlo ganacsi ayaa la sheegay inay u iman jireen goobtaas. Dherida iyo jiimbaarada ay sameeyaan Eylada ayey ka iibsan jireen, markaasey degmooyinka kale geyn jireen si ay uga baayacmushtareeyaan.

Ganacsi wanaagsan ayaa ka dhexeeyey ayaga iyo ugaarsatada,markii dambena wey isdhexgaleenxx, waxeyna degeen B/Heybe ayagoo hawlo-hoodii ganacsi wata waxeyna la baxeen magaca ah Shaanshiye. Ganacsigoodii aad bey uga faa'ideen, markii dambena dhar iyo waxyaabo kale ayey keenayeen B/Heybe dukaamo ayeyna ka furteen, tiradoodiina waa badatay.

Qolada kale ee deggan B/Heybe waxaa loo yaqaanaa Goobroon, sidey meesha ku yimaadeena waxey aheyd,hore waxeynu u soo sheegnay in xilligii gumeysiga ay jireen nabadoono qabiil walba masuul ka ahaa oo la aqoonsanaa, waxeyna sumcad weyn ku lahaayeen maamulkii gumeysiga. Hadaba nabadoonada Eyladu ma aheyn kuwo la aqoonsan ayhay waayo, waxaa loo haystay dad la yasaayo . Si ay sumcad ugu yeeshaan maamulkii gumaysiga ee waagaas jirey, ayaa waxay uyeerteen SHeekh Gurey oo ahaa wadaad aad ugu dheer xaga diinta iyo xertiisa si uu suldaan ugu noqdo oo loo aqoonsado. Wadaadku Wuxuu ahaa Goobroon,Wuxuuna deganaa Afgooye,halkii ayey-diinta faafideeda ka sii wadeen asaga iyo xertiisiiba. Eyladii ku nooleyd B/Heybe si Fiican bay Ubarteen cilmiga, aad bayna Uxushma yn, jireen. Wixii DHibaatooyin ah oo ka dhex DHasha Eylada asaga-Ayaa Xalin Jirey. Goobroon wuxuu noqday qabiilka kaliya ee ay Eyl adu aad utixgaliyaan maadaama ay suldaan ka dhigteen,xoolo badan-iyo beero ayey siiyeen laakiin isma guursadaan.

SHeekh Gurey suldaan wuxuu unoqday Eylada sanadku marku ahaa*1921dii ilaa uu dhintay 1943dii. Markuu dhintay SHeekh Gurey waxaa dhaxlay wiilkkisa oo isna la yiraahdoSHeekh Maxamed 1943dii walina isagaa suldaan ka ah meeshaas. SHeekh Maxamed wuxuu raacay wadadii aabihiis,isna waa wadaad ku dheer xaga diinta aad baana -looga dambeeyaa. Hadaba Goobroonta meesha degan waa faracii sulda akaiyo qoysaska culumadiisii. Eylada iyo ayaga aad bay isugu xira n,yihiin taasoo ah xaga diinta laakiin dhaqan ahaan aad bay ukal la duwan yihiin ismana guursadaan.

Qolada kale ee degan B/Heybe waa koox tira yar oo loo yaqaan Boon-Eelaay, sababta loo yirina waxay tahay waxay sama yn jireen dharida oo lagu ogaa Eyla kaliya inay samayso.Qoladaan waxaa la sheegayinay ugaarsan jireen,waxayna leeyihiin beero kuwa asoo la sheegay inay ahaayeen kuwii ay ka dhaceen ugaarsatada.Bee rihii siday utacbanayeen ayaa waxay barteen dhari samayn,halkaase ay,ku bedeleen dhaqankii ay lahaayeen.



## CAYAARAHA UGAARSATADA

Ugaarsatada B/Heybe waxey leeyihiin cayaaro u gaar ah oo ay cayaaraan maalmo qadarin iyo xusuus mudan sada iidaha iyo maalmaha siyaarta ee buurta la fuulaayo, cayaarahaas waxaa ka mid ah cayaarta loo yaqaan Xayaadka iyo Shuulèy.
Cayaarahaas mid walba waxey leedahay hab gooni ah oo loo cayaaro iyo heeso u gaar ah. Dhamaantoodna durbaan ayaa la garaacaa marka la cayaarayo, qaarna fadhi ayaa lagu garaacaa qaarna taagni .

Cayaarahan mudo badan ayey ugaarsatadu cayaarayeen inkastoo la sheegay markay cayaarayaan ay matalayaan ama ay sameynayaan dhaqdhaqaaqa ugaarta. Tusaale ahaan markaad fiirisid Xayaadka kolkey cayaarayaan waxaad moodeysaa inay iney iska dhigayaan sida ogaartii oo cayaareysa ama ay dhadhaajinaayaan.


Taasi waxey caddeyneysaa in ugaarsatadu yihiin dad aad u jecel ugaarta ,maadaama ay doorbideen inay u cayaaraan sida ugaartii islamarkaana ay ku amaanayaan heesahooda .

## Cayaarta Xayaadka

E Cayaarta Xayaadku waa cayaarta ugu qadiimsan ay ugaarsatadu cayaaraan, waxaana la sheegay in si joogto ah looga cayaro meel walba oo ay ugaarsatadu joogaan islamarkaana ay tahay cayaarta ugu qiimaha badan ayna ugu jacel yihiin. Waxaa la yiraahdaa qofku markuu cayaarayo rooxaan ama jiniyo ayaa ku soo dega sida saarka iyo booranaha oo kale, ilaa qofku uu ka miirsadana waa la wadayaa cayaarta ayadoo ay weheliyaan dhowr ruux oo markaasi la cayaaraya. Xayaadku naago iyo nimanba waa cayaaraan inkastoo garaacida qalabku ragga u gaar yahay, haweenkuna ay jiibiyaan heesaha. Xayaadka ay cayaaraan ugaarsatadu wuxuu u kala baxaa 3 nooc:

1) Xayaad Harbiyey (Aw Jiisey)
2) Xayaad Farji
3) Xayaad Eyli

# CAYAARTA XAYAADKA



Midda keliya ay ku kala duwan yihiin sedexda nooc ee xayaadka waa Xayaad Harbiyey iyo Xayaad Farji waxaa loo isticmaalaa durbaano waaweyn oo taagni lagu garaaco, Xayaad Eylena waxaa loo adeegsadaa durbaanno gaagaaban oo fadhiga lagu garaaco, inkastoo garaacidoodu isku mid tahay hadana waxaad moodaa dhawaaqoodu xoogaa inuu kala duwan yahay.


Qalabka kale ee loo isticmaalo Xayaadka uguna muhiimsan waxaa loo yaqaan SHAMBAL, oo ~~xx~~ ka sameysan laba qalbac (geed)oo midkiiba/meel dhexda ah ka xoldhan yahay oo kolka la isku dhufto dhawaaq sida koorta ueg ka soo yeero. Dhamaan heesaha loo isticmaalo Xayaadku waa heeso nebi amaan ah oo ay ku amaanaan nabiyada, awliyada iyo diinta.

## Cayaarta Shuuley

Cayaarta Shuuley waxey ka mid tahay cayaaraha ugu muhiimsan ay ugaarsatadu cayaaraan. Cayaartan waa cayaar ragga keliya ay cayaaraan, waxeyna leedahay hab gaar ah oo loo dheelo oo ka duwan sida xayaadka loo cayaaro. Cayaarta Shuuley sideedaba waa tartan, fadhi ama kadaloob ayaana lagu cayaaraa; tusaale ahaan laba qolo ayaa tartameysa, qoladii laga guuleysto ayaa dad martigelineysa marka dambe ee la ciyaarayo.

Sida loo cayaaro Shuuley waxey tahay geed hoostiis ayaa gogol la fidinayaa, gogoshaas waxaa ku fariisanaayo 4 nin oo labada qolo ka kala sooda, labadii isku koox ahba hal dhinac bey kadaloobsanayaan labada kalena wey kasoo horjeesanayaan. Shuuley waxaa loo isticmaalaa hal durbaan oo nin keliya garaacayo, waxeyna leedahay hab gaar ah loo garaaco. Kolka la garaacayo durbaanka nimanka fadhiya ayaguna gacmaha ayey dhulka ku garaacayaan ayagoo raacaya dhawaaqa durbaanka. Kooxda inteeda kalena waxey qaadayaan heeso islamarkaana, ayagoo ~~xxxxxxx~~ sacabada garaacaya si wada jir ah ayey durbaanka ula raacaan.

CAYAARTA SHUULEEY



Markaa waxaa la doonayaa ninka x durbaanka garaacaya iyo kuwa cayaaraya inay iskumar joojiyaan oo gacanta ay isla helaan, qoladii markaas gefta dhibco ayaa laga qaadanayaa.

Cayaarta Shuuley waa cayaar runtii xiiso badan qolada ixyx guuleystaa waxey noqoneysaa qolada la martigelin doono cayaaraha dambe, ilaa laga guuleystana ma martigelinayaan qolada kale. Heesaha loo isticmaalo cayaartan gebi ahaanba waxay ku saleysan yihiin ammaan ku saabsan ugaarta waxaana ka mid ah :-

Adì Owkì ley Dhalati,
Aashki Boodowshee ay Kiin Sheegi;
Adì Owkì ley Dhalati,
Alalaadì ay Kiin Sheegi,
Arooskaa Ul-Bareey waa Ay Kiin Kuulee.
Beykaa Ugaarooy, Biligaa Tuugooy
Eeloodeey Ariiteey liin Maalee,
Iski laalaadee,Laameyteey Laantì Dhamagì,
Shaareegoo waa Adii liki Sheegey Shibdhè
Awoow Eenoow Ugaar Jeeloow Alow Raxma;
Gaaboodey Iidoow Gelmaanyè Aroorti,
Uusey ma Aamaw Aroorshee waa Degee maa,
Anii Hubiyì Haluulkaa Tabaasey.
Sagaarì Mintaaniidì Boon Jersheewaa
Aduunyì Beenwaa Aroorshee ley hal ii duugooy;
Saruuraay Aw Samoow,
Sataar yaroow Suuridaà wal Giliyee,
Sankaa ku Gooyee, Suuridiyè wal Giliyee;
Horyarooy Laantaa Hoosmaa Hergelee !
Aroorkaa Abaq waa Eel mal in Seedaaw,
Eeyduurkoowaa Oonlowkì mey Sheeni,
Aroomiideey Arooy Iriguunkì Mey sheeni,
Hilooweey Haadmaa li Buubee! .

## CUTUBKA AFARAAD

### TAARIIKHDA BUUR-HEYBE

Sida ay sheegeen odayaasha ku nool B/Heybe, waxaa la deganaa goobtaas muddo ku siman toban qarni iyo in ka badan. Deegaanka B/Heybe waxey ka mid tahay meelaha ugu qadiimsan Soomaaliya oo mudo hore la deganaan jiray. Culimo ku xeel dheer Cilmiga Arkiyoolojiga (Archeological Science) oo baaritaan ku sameeyey goobtaas waxey sheegeen in la deganaa ama ay nololi ka jirtey mudo haatan laga joogo 7000 (todoba kun) oo sano, waxeyna halkaas ka soo sareen qalab ay istiomaali jireen dadkii waagii hore ku noolaan jirey degaankaas.

Hadaba culimadu waxey daraasad dheer ku sameeyeen wax-yaabihii ay halkaas ka heleen ayagoo qoday godad waaweyn oo buurta hoosteeda ku yaalay taasoo u suuragelisay iney helaan qabuuro mudo hore ahaa. Qabri ka mid ah qabuurahaas waxaa lagu arkey lafo dad, qof gaoanta ku haya canug yar isla markaana ceejinaayo. Taasi waxey cadeyneysaa in dadkii ku noolaan jirey B/Heybe waqtiyadii hore ay lahaayeen caadooyin u gaar ah ama hab gooni ah oo ay isu xabaalaan markey dhintaan, waxaana la helay raadad muujinaayo inay ahaayeen ugaarsato.

Hadeynu xoogaa guudmar ku sameyno deegaanka B/Heybe waxey ka tirsan tahay degmada B/Xakaba oo ka tirsan gobolka Bay, waxeyna u jirtaa 37 Km, waxeyna ku taalaa dhanka woqooyi ee Deg. B/Xakaba. B/Heybe waxey deris la tahay ama ku wareegsan buuro fara badan oo gaaraya ilaa 15 buurood iyo in ka badan, waxaana ka mid ah buurahaas :

1) Buur Fiileey
2) Goy Maroow
3) Buur Qaloow
4) Hundooliyoow
5) Mi Dhoweey
6) Shirfoolè
7) Dharaay
8) Kiilaagè
9) Banoodi
10) Maamudeey

# BUUR - HAYBE



11) Aw Yaasiin

12) IL-Yaaqleedì

13) Buur Gaduudì

14) Buur Kuuloow

15) Durdurì iyo kuwo kale oo fara badan .

Buuraha ku yaal geyigaas oo dhan waxaa ugu dheer B/Heybe, waxeyna ku fadhidaa dhul dhan 4Km oo isku wareeg ah, dhererkeeduna wuxuu gaarayaa 1866 fiit. Buurta kale ee ku xigta waa B/Xakaba oo iyaduna jeeda 1180 m, kuna fadhida dhul baaxadiisu dhan tahay 3.14 $Km^2$. Buuraha ku hareereysan B/Heybe waxey isu jiraan masaafo yar tan ugu fogna 15Km ayey u jirtaa waxaana la yiraahdaa Hundooliyoow . Buurahaas aan soo sheegnay dhamaantood waa beelo ay ku nool yihiin dad isugu dhafan ugaarsato iyo beeraleey .

Buur-Heybe waagii hore waxaa la dhihi jiray Buur-Eyle, maxaa yeelay qolada la yiraahdo Eylè ayaa ku badan sidaas darteed ayaa loogu magacdaray. Hore waxeynu u soo sheegnay in Eyladu ay yihiin dad aad ugu xeel dheer sameynta dheryaha, ciida ay ka sameeyaan dheryaha ayaa waxaa loo yaqaanaa Heybì, goobtaas oo keliya ayaa laga helaa ilaa waqtigan aynu joogno. Waxaana looga iman jirey meelo badan oo koonfurta Soomaaliya ka mid ah, sidaa darteed ayuu magacii B/EYlè isu bedelay magaca maanta loo yaqaan oo ah Buur-Heybe .

B/Heybe waa beel qadiimi ah oo aad uda' weyn, waxeyna laheyd dhacdooyin iyo maanso la tiriyey waqtiyo aad iyo aad ufog, hase yeeshee ay dabargo'een qoraal la'aan aawgeed.
Waxaa jira ceel la yiraahdo (Guhaad) oo ku yaala buurta salkeeda hoose oo aan weligii gureyn, kaasoo xoolaha ay ku waraabsadaan ayna cabaan biyihiisa hadii ay abaari dhacdo iyo hadii kaleba. Biyaha ceelkaasi waxey ka yimaadaan ilo ku yaal buurta dusheeda taasoo suurtogelisay in umado waqtiyo kala duwan noolaa ay degeen B/heybe ilaa maantana weli la degan yahay.

Waxaa jirta maahmaah ay ku maahmaahaan dadka ku nool carigaas waxeyna yiraahdaan :

" Guhaad Biyì Luku Waayì, Guwaa Li Waayì " taasoo micnahoodu yahay haddii ceelka la yiraahdo Guhaad biyo laga waayo, waxey la mid tahay xilliga guga oo la waayey. Waxeynu ogsoonahay in xiliga guga ay dalkeena ka da'aan roobab aad iyo aad u fara badan kaasoo dhulka oo dhan barwaaqo ka dhiga, waro badana buuxiya sidaa darted ayey barbardhigeen ceel Guhaad oo ay yiraahdeen gu' ayuu la mid yahay.


GOGOSHIIS - QABE

Sideynu hore u soo sheegnay B/Heybe waa meel qadiim ah oo aad u da' weyn, waxeyna laheyd sheekooyin iyo maanso la tiriyey waqtiyo aad u fog. Dhab ahaantii heesaha iyo gabayada ay ku ciyaaraan dhalinyarada B/Heybe hadaad u fiirsato waa kuwo ka turjumaya tusaalena ka bixinaya qisooyin ama dhacdooyin ka dhacay geyigaas waqtiyo hore oo lasoo dhaafay.

Dhacdooyinkaas waxaa ka mid ah "Gogoshiis-Qabe" goobta la yiraahdo oo ku taal meel ka mid ah buurta dusheeda oo waagii hore ay odayaasha B/Heybe ay u isticmaali jireen maxkamad ahaan ama goob ay ku shiraan oo ay garta ku gooyaan . Hadii ay dhacdo in laba ruux ay beer isku qabsadaan ama xoolo iyo wixii la mid ah dacwadooda waxaa lagu qaadi jirey Gogoshiis-Qabe si loogu garnaqo. Ruuxii ruux kale dila isagana waxaa lagu xukumi jirey dil, si ayan u dhicin dagaal ka dhex dhasha labada qoys ee nimanku ka dhasheen.

Waxaa jira geed la yiraahdo (Yaaq-Qatil) oo ku yaal buurta agteeda, geedkaas ayaa lagu deldeli jirey gacan kudhiiglaha iyadoo dadka kunool tuulada oo dhan halkaas la isugu yeeri jirey. Dadku markey arkaan deldelaada, wey ka waantoobi jireen falalka xunxun ay kula kacayaan bulshada dhexdeeda; Bulsho hadii ay leedahay xukun adag waxaa hubaal ah inay noqoneyso bulsho cadaalad ku dhisan iyo nabadgelyo, dadkuna ay garanayaan ujeedadooda .

Ugaarta ay Dabtaan Ugaarsatada.



Hadaba dadka ku nool B/Heybe mar walba oo ay deldelaad jirto waxaa la isugu yeeri inay yimaadaan "Yaaq-Qatil" taasoo looga jeedo inay ku cibriqaataan.

Odayaasha garta goyn jirey ee Gogoshiis-Qabe isuguiman jirey waxey ahaayeen dadka ugu waaweyn tuulada islamarkaana laga dambeeyo. Dadka ku soo biiraayo golaha ayaga ayaa dooran jirey, shuruudo ayaa jirey markaas ee la iskama dooran jirin qofka. Ruuxa la dooranaayo waa inuu ahaadaa mid oadayaasha ku jira golaha oodhan ay isku raacsan yihiin. Waxaa la fiirinaayaa inuu ruuxaasu ahaa mid bulshada hawlo badan u qabtay islamarkaana yahay nin firfircoon. Qofku haduu yahay mid dhowr jeer dambiyo ka galay bulshada ama uu ahaa garmaqaate lama dooran jirin. Odayaashu ruuxa ku soo biiraayo golaha si fiican ayey uga baaraandegi jireen arimihiisa, haddi leysku raaco inuu yahay ruux wanaagsan oo bulshada waxtari jirey waa la dooranayaa.

Ruuxa cusub marka la doorto tababar ayuu galayaa kaasoo ah; shirarka ay oadayaashu yeelanayaan ayuu ka qeyqaadanayaa, wuxuu dhegeysanayaa sida ay garta u gooyaan, sida wax loo xukumo . markuu mudo joogo wuxuu baranayaa dhamaan xeerarka kala duwan isagoo ka faa'ideysanaayo waayaragnimada odayaasha; kolkaa waxaa la doonayaa hadii meel dhibaato ka dhacdo inuu keligiis xalliyo oo dadka u kala garnaqo. Hadii ay dhacdo ruux inuu ka dhegadeygo xukunka odayaashu ay kusoo rogeen waala takoori jirey, hadii uu dhibaato kale sii geystana dagaal ayaa lagu qaadi jirey.

Xukunka Gogoshiis-Qabe wuxuu ahaa mid adag oo aan sahlaneyn taasoo aan ka garaneyno maamaahdan soo socota :
" Gartì Eylè Gogoliis-Qabì Kì Gohaasè " macnaheeduna wuxuu yahay Eylo garteed goobta la yiraahdo Gogoshiis-Qabe uunbey ku go'daa.

;;......../////// ........

Uqaarsatadu Saqaarada
Ayey ugu Jecel yihiin.




Sagaaro Nin iyo Naag
Oo Wada Socda

## CUTUBKA SHANAAD

### SIYAARTA BUUR-HEYBE

Dadka ku nool beesha B/Heybe iyo agagaaraheeda waxey aaminsan yihiin in buurtu tahay meel muqadas ah sida xaran ookale. Waxeyna yiraahdeen buurtaas dusheeda waa saldhig ay ku kulmaan arwaaxda awliyada ilaahey halkaasoo ay ku tasbiixsadaan habeen - walba; waxaa kaloo ay sheegeen reer B/Heybe hadii buurta la fuulo habeenimo waxaa la arkayaa nuur (Iftiin) meelo ka mid ah buurta dusheeda kaasoo ay ku tilmaameen arwaaxda awliyada ilaahey.

Waxaa caado ah oo wadaadada diinta aad ugu dheer ay aaminsan yihiin in hadii la arko qabri ifaaya habeenkii ruuxaasu yahay awliyo ama qof ilaahey karaameeyey oo daahir ah. Hadaba dadka qaarkii oo aan diinta si fiican u fahansaneyn ayaa waxey ku kacaan falal foolxun oo diinta aan ogoleyn sida, marka la arko qabri ifaaya in laga galo shardi, taasoo ay aaminsan yihiin hadii qofku muraad uu lahaa uu helaayo ama hadii dhibaato ay heysato dhibkii uuka haraayo iyo arimo kale oo fara badan oo runtii ah kuwo lagu baadiyoobo ama ilaah looga fogaado .Sidaas darteed ayaa B/Heybe waxey ahay meel sidaas ah oo shardi loo galo siay uhelaan dambidhaaf iyo muraadkoodaba.

Iftiinkaas markii lagu arkay buurta dusheeda waxaa la sameeyey dhismayaal yaryar oo sida qabuur ookale ah meelo ka mid ah buurta korkeeda taasoo meel walba lagu magacaabay wadaad diinta aad ugu dheeraa ama awliyo ahaa magaciisa, isla goobtaasna ay tahay maqaam isaga ugaar ah oo lagu siyaarto. Waxaa hubaal ah hadii aad fuushid buurta dusheeda inaad ku arkeysid dhismayaashaas aan soo sheegnay iyadoo mid walba uu utaagan yahay qof awliyo ah.

Waxaa jira xus weyn ama siyaaro loo sameeyo nimankaas sanadkiiba mar taasoo lagu qabanaayo beesha B/Heybe; Bisha islaamka ee carafo markey tahay 9ka ayaana la xusaa sannad walba .

Maalinta siyaarta dad badan yaa isugu yimaada B/Heybe oo ka kala yx inaanayo meelo meelo kala gedisan gx ayagoo doonaya inay fuulaan buurta oo cibaadeystaan. Dadka qaarkii waxeyba yiraahdaan siyaarta qofkii ka qeybgala toddoba jeer waxey udhigan tahay isago xajka gutay taasoo ay daliil uga dhigayaan in maalinta banka caraf la taagan yahay iyo maalinta buurta la fuulaayo ay isku beegan yihiin, inkastoo ay beeneeyaan culumaau'diinta oo ay yiraahdeen xx xaj uxna dhiganto laakiin wey banaan tahay.

## Maalinta Buurta La Fuulaayo

Dad badan ayaa isugu yimaada buurta banaankeeda maalinta 9ka carafo ay tahay kuwaasoo doonaya inay fuulaan buurta dusheeda si ay ucibaadeystaan. Dadkaasi waxey isugu jiraan rag iyo haween waxeyna sitaan sahaydooda iyo xoolo ay ugu talagaleen in la qalo xuska dartii ama alabari ay ka dhigtaan.
Maalintaa iyada ah waxaa jira xx damaashaad weyn, iyadoo la cayaarayo cayaaro kala gedisan oo hidaha iyo dhaqanka ay u leeyihiin reer B/Heybe oo ayka mid yihiin Xayaadka, Jaari, iyo Shuuley.

Cayaarahaas intay soodaan waxaad arkeysaa waxyaabo badan oo ku cajab gelinaayo, waxaana ka mid ah; dadkii cayaarahaas iyo munkarka maantoo idil dhexdabaalanaayey ayagoon dhididkii kamayran salaadna aanba weligood wejiga dhigin buurtii koraaya ayagoo leh "Labeek", naagahana sidoo kale ayey sameynayaan.
Buurta fuulideeda aadbey udhib badan tahay, saacado badan ayeyna qaadaneysaa, hadaba waxaa jira xeer u gaar ah fuulida buurta kuwaasoo ah:

1) inaan kabaha lala fuulin buurta.
2) Haweenka waxaa loo ogol yahay iney xirtaan (cambuur-garbeed) iyo matanto ama wax udhigno.
3) Xoolaha loogu talagalay in la qalo( Alabari) ariga oo keliya xg ayaa la ogol yahay in lala fuulo buurta, lo'da iyo geela buurta lalama fuuli karo sidaa darteed dhulka ayaa lagu qalaa.

4) Buurta waxaa la saarnaanayaa mudo laba beri ah, dadkana habeenkii buurta dusheeda ayey seexanayaan ayagoo sahaydoodii quudanaya.

Buurta marka x lasii fuulaayo waxaa jira sedax meelood oo lagu hakado, waxaana lakala yiraahdaa Labeega 1aad,2aad,3aad . Labeega 1aad marka lasoo gaaro oo ah dhagax weyn oo fidsan oo ku yaal meel ka mid ah buurta dadka oo dhan wey wada hakanayaan ayagoo markaasi duceysanaayo, kan 2aad iyo 3aadna sidoo kale. Hadaba taasi waxey natuseysaa in dadka qaarkii ay aaminsan yihiin inay xaj gudanayaan maadaama ay marayaan shuruudihii xajku lahaa. Intaa ka dib dadkii waxey usii gudbayaan goobihii aan soo sheegnay oo lagu magacaabay awliyada, halkaasoo qola walba ay meel degeyso si ay xoolihii ay wadeen uqalaan uguna tasbiixsadaan. Waa teynu hore usoo sheegnay in buurta dusheeda ay leedahay il weyn oo biyo badan kasoo burqanayaan hadaba dadku biyahaas ayey wada istiomaalayaan intey joogaan meesha .

## Waxyaabaha Ay Aaminsan Yihiin

Dadku intay saaran yihiin buurta oo ay gudanayaan siyaarta habeenkii oo idil waxey ku dhafraan dikri, qolo walba goob ayey fariisanayaan oo ay ku dikrinayaan sida; Qaadiriya, Saalixiya iyo Axmadiya iyadoo haweenkuna ay ka qebqaadanaan dikriga jiibintiisa. Intaa ka dib waxaa jira waxyaabo badan oo ay dadku aaminsan yihiin isla markaana ay ka dhigteen bartilmaameedyo waxaana ka mid ah arimahaasi :

1) Laba dhagax oo waaweyn foodooduna ay is saaran tahay oo kuyaal isla buurta dusheeda waxeyna ku magacaabeen sawirkii nebi Aadan iyo Xaawo , sidaa darteed goobtani waxey ka mid tahay meelaha lagu dikriyo.

2) Dhagax weyn oo sida guri usameysan dhexdana ku leh dhagax tiir oo kale ah oo haya , waxaana lagu magacaabay masaajidkii Sheekh C/Qaadir, x goobtana waxey kamid tahay meelaha lagu tukado laguna dikriyo.

3) Waxaa jirta meel ay yiraahdeen waxaa ku yaal raadkii Xaawo, oo ah dhagax weyn oo guri ookale u sameysan, halkaasna waxaa seexda ama ku dikriya haweenka.

4) Meel la yiraahdo marinka khatarta ayaa jirta oo ah meel qodan oo ceel ookale ah, lagana talaabo oo aan sahal aheyn, dushana waxaa kaga dadban dhagax dhuuban. Waxaa la yiraahdaa naagtii ninkeedu aan ogoleyn soo aada siyaarta magudbi kareyso iyo qofkii qof kale colaad xun ka dhaxeyso;maxaa yeelay markey katalaab isdhahaan dhagaxii ku dadbanaa meesha ayaa goobtiisii ka qaadmaya ayey yiraahdeen, sidaa darteed ruuxii ka baqanaya arimahaas marka hore uu soo aadayo siyaarta ayuu soo xalinayaa si ayan arintaasi ugudhicin.

5) Waxaa jirta iyadna laba goobood oo dhagxaan ku wareegsan oo lagu magacaabay maloamado ama dugsiyo quraan oo ay leeyihiin Xasan iyo Xuseen oo ah wiilashii uu dhalay Cali Binu Abii dhaalib, meelahaas ayaguna waxey yihiin goobo lagu subciyo habeenkii.

6) Waxaa kaloo jira sideynu hore usoo sheegnay dhismayaal qabuuro ah oo ku yaal meelo kala duduwan isla buurta dusheeda laguna magacaabay dad awliyo ahaan jirey sida :

1- Sheekh Aweys.
2- Sheekh Xuseen Baaliyaale.
3- Sheekh Nuur iyo kuwo kale oo fara badan.

Goobahaas ama qabuurahaas ayaguna waxey ka mid yihiin meelaha alabariga lagu sameeyo isla markaana lagu dikriyo.

Waxyaabaha Sababay Siyaarta

Qof walba waxaa laga yaabaa inuu isweydiiyo su'aasha ah siyaarta B/Heybe ee sanad walba laqabto bisha carrafo 9keeda , sidey ku timid ? ,Kolkii aan weydiiyey su'aashaas odayaasha B/heyb waxey iigu jawaabeen annagu ma garaneyno sidey ku timid, laakiin waxaan kasoo gaarnay awoowayaasheen intii ay noolaayeen ilaa hadana waa socotaa. Jawaabtaasu ma aheyn mid lagu qanci karo waayo waxaa laga yaabaa in diin kale oo hore u jiri jirtay ay kasoo jeedo.

Waxaa hubaal ah in marka ay diimuhu isbedelayaan,diintii hore ay raad ku reebeyso mida cusub taasoo laga garan karo. Baniaadamkuna sidiisaba waa daciif oo wuxuu aaminsan yahay haduu diinta ka tago inuu la kulmaayo balaayo ama abaar iyo wixii lamid ah taasoo uu ka baqayo iney naftiisu halis gasho tusaale ahaan; Istunka Afgooye ee sannad walba la qabto, dadka cayaartaas cayaara waxey aaminsan yihiin in hadii Istunka la baajiyo ay balaayo ku dhaceyso taasoo runtii wax sanan ah (Superstition) oo la iska aaminay oo ka soo jeeda diimo hore ujiri jiray.

Sidoo kale siyaarta B/Heybe ma aha mid bilaabatay waqtiyo dhow oo la tilmaami karo, waxaana la aaminsan yahay in ay jiri jirtay. Hadaba maadaama aan la hubin xiligii ay rasmi ahaan ubilaabatay siyaartu waxaa laga yaabaa in dhaqamadii dadkii islaamka ka hor ku noolaa meeshaas ay ka soo jeedo, waxeyna ahaayeen gaalo. Dadkaasi waxa laga yaabaa in arwaax ama asnaam buurta dusheeda ku caabudi jireen maadaama ay ahaayeen cawaan islamarkaana ku qaabili jireen damaashaad iyo cayaaro. Kolkii diinta islaamku ay soo gaarteyna si caadi ah ayey ulaqabsadeen ilaa ay tartiib-tartiib ubaabi'yeen dhaqamadii hore iyo diintiiba.Kolkaa siyaartii waxey sameysay tadawur (evolution) waxey iska daayeen asnaamtii ay caabudi jireen waxeyna ku bedeleen waxyaabo waafaqsan diinta islaamka.Raadka ku harayna wuxuu yahay siyaarta iyo cayaaraha oo la iskudhex wado.

........//////////........

GABAGABO

Waxaan buugan qalinjebinta ee cinwaankiisu yahay "Dhaqanka Ugaarsatada Buur-Heybe" kaga soo sheekeynay arimo badan oo ka hadlaya taariikhda iyo dhaqamada ugaarsatada ay lahaan jireen iyo isbedelka ku dhacayba. Waxeynu wax kaga tataabanay habkii ~~xg~~ guurkii hore ee ugaarsatadu iyo farqiga udhexeeyo habka ay maanta isu guursadaan. waxeyna kaloo wax kaga sheegnay habka cayaarahooda sida ay u ugaartaan, xeerarkii ay lahaan jireen ugaarsatadu.

Waxaan isku dayey inaan soo helo magacyo-rugeed badan iyo halkii ay ka yimaadeen, waxaa kaloo aan wax ka tataabanay dhibaatooyinkii ay geysan jireen nimanka la kala ~~x~~ yiraahdo Dubkaa-Baalow iyo Feyla-aarow oo labaduba mar ka talinaayey B/Heybe iyo agagaaraheeda iyo dhibaayinkii iyo halgankii ay soo mareen ugaarsatadu.


Waxaan isku dayey intii awoodeyda ah inaan habeeyo buugaan , wixii qaldaad ah ee kasoo baxa erayo laga tegay iyo kuwo kaleba waxaan akhristayaasha qiimaha leh ka codsanayaa inay raali ahaadaan.

.......////////.......

## RAADRAAC

Intii aan ku hawlanaa qoraalka buugan mahelin qoraallo aan soo xigto sidaa darteed ayaa waxaan wareysiyo badan oo kala gedisan la yeeshay odayaal ku xeel dheer arimahaas iyo rag kale oo wax ka xusuusnaa taariikh oraalka B/Heybe. Hadaba waxaan halkan ku xusayaa dadkii macluumaadkaas wax iiga sheegay, waqtigooda qaaliga ahna ii huray; waxeyna kala yihiin :-

| | DA' | Rug |
|---|---|---|
| 1) Prof. Ciise Maxamed Siyaad | 40 | JUS-Xamar. |
| 2) Cabdalla Cumar Mansuur | 40 | JUS-Xamar. |
| 3) Maxamed Maxamuud Cabdule(Sanka) | 35 | W/Weyn. |
| 4) SH.Maxamed Sh.Gureey | 68 | (Suldaanka B/Heybe |
| 5) Hargaanti Ismaaciil Maame | 70 | B/HEYBE; |
| 6) Muumin Maxamed | 35 | """ . |
| 7) Caliyoow Dhuuboow Aadan | 75 | W/Weyn. |
| 8) Aw Eyloow Malable | 90 | " " . |
| 9) AWeys Axmed Aadan | 22 | Afgooye. |
| 10) Maxamed Nuur (Cusboole) | 26 | Kul. VEternary. |
| 11) C/Naasir Max'd Warsame | 26 | Kul. Engeneering. |
| 12) Xuseen Max'ud Cabdule | 27 | DEG. Afgooye. |
| 13) Maano Max'ud Cabdule | 25 | Xamar. |
| 14) Muuse SH. Muuse | 26 | " "". |
| 15) Cismaan Max'ed Axmed | 26 | """. |
| 16) Shamso Sh. Mukhtaar | 24 | "". |


SIYAARTA BUUR-HAYBE
WEES

## Eray-Bixin

Ugaarsatada aymu kor uga soo hadalnay afguriga ay ku hadasho cid hore wax uga qortay majirto. Saa awgeed waxaan sameeyey tijaabo ku saleysan erayada maguuraanka ah ee aan beelin[a] lumin; waxaana kasoo baxay inay ku hadlaan afguri isugu dhafan Maay iyo Maxaatiri intaba. Eeg liiska hoos ku taxan :

All - Kulli
Animal - Duunyì
Ashes - Deeb
Back - Reed,Ered
Belly - Uurkì
Big - Moon,Wiin
Bird - Shimbir
Bite - Dhegmi
Black - Midow
Breast - Labè,Naas
Call - Weeroow
Child - Onog, Abeedin
Cloud - Hogol,Siddì
Come - Kooy
Cut - Galaboow,Gooy
Die - Amuushì
Dog - Maarrì,Eey
Dust - Habaas,Bus
Earth - Arlaadi
Eat - Aan
Eight - Siyeed
Fall - Kufoow
Far - Dheer
Fear - Rubud,Obsì
Feather - Baal
Fish - Malalaay.

[redacted]

| | |
|---|---|
| Fly | — Buuboow, Teesi |
| Foot | — Kaab |
| Give | — Si |
| Go | — Araaw |
| Grass | — Ees, Baryi |
| Guts | — Uur, Buyli |
| He | — Usi |
| Hand | — Galan |
| Hear | — Dhaag, Dheeg |
| Heart | — Wedni |
| Heavy | — Ulaab, Uliis |
| Hit | — Tun, Bugdhaw |
| Horn | — Gaas, Gees |
| How much | — Meegaa |
| Hunt | — Ugeerishi |
| Knee | — Jilib, Hooqi |
| Know | — Ogaan, Barashi |
| Laugh | — Kood |
| Left | — Gur, Araaw |
| Liver | — Turaaw, Beer |
| Man | — Lan, Harti |
| Many | — Badin |
| Milk | — Wan, Aani |
| Meat | — So', Hilib |
| Moon | — Billi |
| Mother | — Aay |
| Mountain | — Dhadhaab, Buur |
| Name | — Magi, Issin |
| Neck | — Surki, Lugun, Qoor. |
| New | — Usub |
| Night | — Hamiin, Oow |
| Nine | — Sagaal |
| Nose | — San. |